Waxaad xaq u leedahay inaad ku casuumto martida bulshada waqti macquul ah iyo inaad lahaato soo-booqdayaal ganacsi qeybtaada kirada ayadoon lahayn faragelinta milkiilaha guriga. Martidu waa inay u hoggaansamaan dhammaan xeerarka ku saabsan aagagga guud ee quseeya kiraystayaasha.

U oggolaanshaha Dadka kale inay Soo galaan

Heshiiskaaga kiradu wuxuu cayimayaa cidda loo ogol yahay inuu kula joogo guriga kirada ah. Hadaad rabto inuu qof kale kula soo dego ama uu kula sii joogo waqti dheer, waxaad u baahan doontaa inaad weydiisato ogolaanshaha mulkiilaha. Mulkiiluhu waxaa laga yaabaa inuu doonayo inuu ku sameeyo baaritaan taarikheed kiraystaha cusub, kor u qaado lacagta kirada, ama u baahdo in shaqsiga lagu daro heshiiska. Hubso in heshiis kasta oo u oggolaanaya dadka kale inay kula soo dagaan ay tahay mid qoraal ah.

Asturnaanta Kireystayaasha ay Xaq Uleeyihiin

Sharciga Pennsylvania wuxuu sheegayaa in heshiis kasta oo (haddii uu yahay qoraal ama hadal), ay jirto balanqaad in mulkiiluhu uusan si caqli gal ah u faragelin doonin xuquuqda kiraystaha uu ku leeyahay dhismaha uu kiraystay. **Ballanqaadkan Raaxo Deggan,** wuxuu kaloo kujiraa xuquuqda asturnaanta. Kirada la siiyay kaliya maahan inaad heshay hoy, laakiin waxay sidoo kale hubineysaa inaad xaq u leedahay inaad ku raaxeyso dhismaha adigoon fara gelin aan caqli gal aheyn oo xad dhaaf ah aan kala kulmin milkiilaha guriga.

Mulkiileyaashu waxay kaliya xaq u leeyihiin inay si macquul ah usoo galaan guryaha ijaarka ah. Haddii mulkiiluhu uu galo qaybta ijaarka sabab la'aan ama uu khalkhal gelyo kiraystaha habeenkii, isaga ama iyadu way jebin kartaa heshiiska. Mulkiiluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu galo guryaha kirada ah mararka qaarkood ujeedooyin macquul ah oo ay ku jiraan kormeerka iyo dayactirka, hagaajinta, ama inuu tuso guriga iibsadayaasha ama kiraystayaasha mustaqbalka. Macquul ah ayaa sidoo kale micnaheedu tahay in mulkiiluhu uu yimaado waqti macquul ah, siiyo ogaysiis hore kireystaha marka hore, waana inuu marka hore garaacaa—ilaa ay jirto xaalad degdeg ahi moyee. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah sida tuubbooyinka biyaha oo jaban ama qalabka sheega qiiqa oo hawlgalay, markaa mulkiiluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu isla markaaba soo galo ayadoon ogeysiis hore labixin.

Haddii heshiisku sheegayo in mulkiiluhu uu soo gali karo ogeysiis la'aan saacado macquul ah, kiraystuhu xaq uma laha inuu u baahdo ogaysiis hore. Si kastaba ha noqotee, haddii milkiilaha ama shaqaaluhu si joogto ah u galo ogeysiis la'aan, kiraystuhu waa inuu u diraa mulkiilaha warqad uu ku weydiinayo ugu yaraan 24 saacadood oo ogeysiis ah ka hor intuusan soo gelin markaysan jirin xaalad degdeg ah, haysashada nuqul warqad ah uguna dirto warqada asalka ah boosto la xaqiijiyay, "risiidhka soo celinta ayaa la codsanayaa". In kastoo milkiiluhu uusan ku qasbaneyn inuu u hogaansamo dalabka ogaysiiska hore, xushmaynta wadajirka ah waxay ku dhiiri gelinaysaa mulkiilaha inuu siiyo ogeysiiska kiraystaha kahor intaysan soo gelin qaybta ijaarka. Haddii mulkiiluhu u hoggaansamo heerarka guud ee kor lagu soo sheegay oo uu si isdaba joog ah u galo qaybta ijaarka isagoon ogeysiis la helin, mulkiiluhu waxaa laga yaabaa in loo tixraaco inuu xadgudbay. Wac waaxda booliiska deegaanka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Xeerka 1951 ee Mulkiilaha iyo Kireystaha

Qaadashada Hantida Qofka ee La Lahaysto

Xeerkii Oktoobar 22, 2014, P.L. 2620, No. 167 Cl. 68
Kalfadhiga 2014
No. 2014-167
HB 1714

XEER

Wax ka badalida xeerkii Abriil 6, 1951 (P.L.69, No.20), cinwaankiisu yahay "xeer la xiriira xuquuqaha, waajibaadka iyo waajibaadka milkiilaha iyo kireystaha iyo dhinacyada la macaamilaya iyo hagaajinta, dib-u-habeynta, beddelida iyo xoojinta sharciga la xiriira," sii wadida bixinta qaab dhismeedka hantida shaqsiyadeed ee la dayacay.

Golaha guud ee Commonwealth of Pennsylvania wuxuu halkan ku dhaqangelinaysaa sida soo socota:

Qaybta 1aad. Qaybta 505.1 ee xeerkiii Abriil 6, 1951 (P.L.69, No.20), oo loo yaqaan Xeerka Mulkiilaha iyo Kireystaha ee 1951, oo lagu daray Luulyo 5, 2012 (P.L.1091, No.129), ayaa wax laga beddelay in la akhriyo:

Qaybta 505.1. Qaadashada Hantida Qofka ee La Lahaysto.-- (a) [Waqtiga kiraystuhu joojiyo lahaanshaha guriga, kiraystuhu waa inuu ka saaraa dhismaha guriga dhammaan alaabooyinka hantida kiraystaha shaqsiyeed. Ujeeddooyinka qaybtan, kirayste waxaa loo qaadan doonaa inuu ka tanaasulay lahaanshihiisa dhismaha mid kasta oo kamid ah waxyaabahan soo socda:

1. Fulinta amar lahaansho iyadoo la door bidaayo milkiilaha.
2. Haddii kiraystuhu si muuqata uga baxay dhismaha, ka saarista gabi ahaanba dhammaan hantida shaqsiyeed iyo siinta cinwaanka loo gudbinaya ama ogeysiis qoran oo sheegaya in kiraystuhu ka baxay dhismayaashii.

(b) Markay ka tanaasulaan dhismaha qayb hoosaad (a) iyo aqbalaadda lahaanshaha guriga ee milkiilaha, kiraystuhu wuxuu heysan doonaa toban maalmood oo uu kula xiriiro milkiilaha oo ku saabsan ujeeddada kiraystaha inuu ka saaro wixii hanti shaqsiyeed ee ka harsan dhismaha. Haddii ujeeddada loo gudbiyo milkiilaha, hantida shakhsiga waxaa hayn doona milkiilaha oo uu dhigi karaa goobta uu milkiilaha doorto muddo dhan soddon maalmood. Haddii aan wax xiriir ah lala sameyn milkiilaha muddo toban maalmood gudahood ah, hantida waxaa la tuuri karaa dhammaadka tobanka maalmood iyadoo ay tahay ikhtiyaarka milkiilaha.

(c) Haddii hantida shakhsi ahaaneed ay ku nagaato dhismaha ka dib ka-tagitaankii guryaha ee kiraystaha, waxyaabaha soo socdaa ayaa lagu dabaqi doonaa:

1. Haddii uu jiro aqbalaadda guriga ah ee milkiilaha guriga qayb hoosaadka (a) (1) oo qoraal ama amar lahaansho ay kujiraan ogeysiiska qayb hoosaadka (b), milkiilaha looma baahna inuu siiyo ogaysiis dheeri ah kiraystaha.

2. Haddii uu jiro aqbalida guriga oo milkiiluhu ee qayb hoosaadka (a) (2) oo heshiiska kirada ama heshiiska kirada dheeraadka ah uu ka kooban yahay ogaysiiska qayb hoosaadka (b), kireeyaha waxaa looga baahan doonaa inuu siiyo ogeysiis qoraal ah kiraystaha hantida shaqsiyeed waxay kusii jiri guriga waana inuu qaataa kiraystuhu. Ogaysiiska ku xusan faqradan wuxuu siin doonaa kiraystaha toban maalmood laga bilaabo taariikhda calaamadda boostada ee ogeysiiska si loogu ogeysiiyo milkiilaha inuu kiraystuhu dib u soo ceshan doono hantida shaqsiyeed. Haddii ujeedka loo gudbiyey milkiilaha, hantida shakhsi ahaaneed waxaa sii hayn doona milkiilaha wuxuuna ku hayn doona goobta uu milkiilaha doorto muddo dhan soddon maalmood laga bilaabo taariikhda calaamadda ogeysiiska. Haddii aan wax xiriir ah lala sameyn milkiilaha muddo toban maalmood gudahood ah, hantida waxaa la tuuri karaa dhammaadka tobanka maalmood iyadoo ay tahay ikhtiyaarka milkiilaha. Ogeysiiska waxaa sidoo kale ku jiraya lambar taleefan iyo cinwaan halka milkiilaha lagala soo xiriiri karo waana inuu cadeeyaa goobta hantidaas lagusoo qaadan karo. Ogeysiiska waa in:

(i) ay usoo diraa boosto joogta ah cinwaanka ugudbinta kireeystaha, haddii la bixiyo, ama, haddii aan cinwaanka gudbinta la bixin, ka dib dhismihii hore ee la kireystay; ama

(ii) iyadoo si gaar ah loo siinayo kiraystaha.

3. Haddii heshiiska kirada ama heshiiska dheeraadka ah ee kiradu uusan ku jirin ogeysiiska qayb hoosaadka (b), mulkiiluhu, marka lagu daro u hoggaansanaanta shuruudaha baaragaraaf (2), wuxuu ogeysiin u dirayaa xiriir kasta oo degdeg ah oo uu kiraystuhu ku bixiyay heshiiskii kirada.
4. Ogeysiis kasta ee looga baahan yahay qayb hoosaadkan waa inay sidoo kale ku jirtaa macluumaad ah in kiraystaha looga baahan doono inuu bixiyo kharashaadka la xiriira rarida ama kaydinta hantida uu dib uqaatay kiraystaha toban maalmood ka dib sida waafaqsan qayb hoosaadka (f).

(d) Waqtiyada oo dhan inta udhaxaysa aqbalida guriga mulkiilaha iyo dhicida mudada toban ama soddon maalmood, mulkiiluhu wuxuu ku dhaqmi doonaa daryeel caadi ah oo kusaabsan wixii hanti shaqsiyeed ee kiraystihii hore uga tagay ama ku haystay guriga.

(e) Kadib muddada ku habboon sida ku xusan qayb hoosaadka (d) uu wakhtigiisu dhammaado, mulkiiluhu mas'uuliyad dheeraad kama ah kiraystaha hore ee la xiriira hantida shakhsiyeed waxaana laga yaabaa, ikhtiyaarka milkiilaha inuu iska tuuro hantida. Haddii hantida shaqsiyeed la iibiyo oo lacagtu ka badato wixii uu kulahaa milkiilaha, lacagtu waa in lagu soo diraa kiraystaha boosto sugan. Haddii uusan jirin cinwaan uu kiraystihii hore siiyay milkiilaha, kireeyaha wuxuu hayn doonaa lacagta soo hartay soddon maalmood, haddii aan la sheegin, wuxuu sii hayn karaa lacagta soo hartay.

(f) Haddii milkiiluhu ogeysiiska siiyo kiraystaha marka loo eego qayb hoosaadka (c), mulkiiluhu wuxuu dooran karaa inuu ku keydiyo hantida kiraystaha meel kale oo u dhow oo macquul ah dhismaha kirada ah. Haddii mulkiiluhu doorto inuu ku kaydiyo meel kale, milkiilaha gurigu wuxuu ka saari karaa guriga si kasta oo ay tahay

si macquul ah loo xisaabiyo si loo ilaaliyo hantida waqtiga loo baahan yahay sida ku xusan qaybtan. Kiraystaha looma baahna inuu bixiyo wixii kharash ah ee la xiriira raritaanka ama keydinta hantida mulkiilaha haddii kiraystihii hore uu dib uqaadan rabo hantida shakhsi ahaaneed muddo toban maalmood gudahood ah taariikhda calaamada lagu soo ogeysiiyay. Haddii kiraystihii hore dib ula soo wareego hantida shaqsi ahaaneed kadib toban maalmood oo ka bilaabata taariikhda ogeysiiska shabadaysan laakiin ka hor soddon maalmood, kiraystuhu waxaa looga baahan yahay inuu bixiyo wixii kharash macquul ah ee la xiriira rarida ama keydinta hantida mulkiilaha mudadaas. Marka la joojiyo heshiiska kirada ama ka tanaasulka lahaanshaha hantida ma guurtada ah, kiraystuhu wuxuu meesha ka saarayaa dhammaan hantida shaqsiyadeed kiradii ama ijaarkii hore. Hanti shaqsi ahaaneed ee looga tagay dhismaha waxaa laga yaabaa in lagu tuuro ayadoo ku xiran ikhtiyaarka milkiilaha, iyadoo la raacayo qodobbada qaybtan.

(b) Hantida shakhsiga ah ee ka hartay dhismaha waxaa loo qaadan karaa in laga tegay haddii mid ka mid ah waxyaabaha soo socda ay quseeyaan:

1. Kiraystuhu wuu ka guuray guriga kadib markuu dhamaaday heshiis kiro ee qoraalka ahaa.
2. Amarka guri ka saarida ama amarka lahaanshaha iyadoo la door bidaayo milkiilaha ayaa la galay kiraystahana wuu ka baxay guriga wuxuuna si buuxda ugala baxay dhammaan hantida shaqsiyeed.
3. Amarka guri ka saarida ama amarka lahaanshaha iyadoo la doorbidaayo mulkiilaha ayaa la fuliyay.
4. Kiraystuhu wuxuu siiyay mulkiilaha ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan cinwaanka soo gudbinta wuxuuna ka baxay waaxda wuxuuna si buuxda ugala baxay dhammaan hantida shaqsiyeed.
5. Kiraystuhu wuxuu ka baxay unugga isaga oo aan la xidhiidhin ulajeeddadiisu ahayd inuu soo laabto, kirada ayaa ka badan daahitaan dhan shan iyo toban maalmood oo la soo dhaafay, dhacdooyinkaas ka dib, milkiiluhu wuxuu soo dhejiyay ogeysiiska xuquuqda kiraystaha ee ku saabsan guriga.

(c) Meesha uu kiraystuhu dhinto oo kaga tago hantida shaqsiyeed dhismaha lasiiyay, qodobada falkan ma quseeyaan. Qaadashada hantida shakhsi ahaaneed ee kiisaska qofka dhintay waxaa lagu maamuli doonaa qodobbada 20 Pa.C.S. §§ 711(1) (laxiriirta ku dhaqanka xukunka qasabka ah iyada oo loo marayo qeybinta maxkamada agoonta guud ahaan) iyo 3392 (oo laxiriirta kala soocida iyo amarka lacag bixinta) iyo qodobada kale ee laxiriira 20 Pa.C.S. (la xiriira qofka dhintay, hantida iyo wakiilka).

(d) Kahor inta aan laga saarin ama la tuurin hantida laga tagay, mulkiiluhu waa inuu siiyaa ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan xuquuqda kiraystaha ee ku saabsan hantida. Kiraystuhu wuxuu heystaa 10 maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska shabadaysan si uu dib ugusoo ceshto hantida ama uu codsado in hantidu lasii keydiyo muddo dheeri ah oo aan ka badneyn soddon maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska. Haddii kiraystuhu sidaas codsado, mulkiiluhu waa inuu hayaa ama kaydiyaa ilaa 30 maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska. Kaydinta waxaa lagu bixin doonaa meesha milkiiluhu doorto oo kiraystahuna mas'uul ayuu ka noqon doona kharashaadka. Waqtiyada oo dhan, mulkiiluhu waa inuu adeegsadaa daryeelka caadiga ah ee ku saabsan maaraynta iyo sugida hantida kiraystaha oo wuxuuna ka dhigi doonaa hantida mid macquul ah loona heli karo ujeedooyinka dib ula wareegida.

(e) Ogeysiiska waxaa loogu diri doonaa kiraystaha boostada darajada koowaad ee kiraystaha cinwaanka guryaha uu kiraystay iyo cinwaan kasta oo loo gudbiyo uu kiraystaha bixiyay, oo ay ku jiraan cinwaan kasta oo loo bixiyo ujeeddooyin deg-deg ah. Ogeysiiska waa inuu ahaadaa qaabkan soo socda:

Hantida shakhsi ahaaneed ee ku hartay (cinwaanka) ayaa hadda loo tixgelinayaa in laga tagay. Toban maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda ku dhajinta ogeysiiska shabada, waa inaad dib u soo celisaa alaab kasta oo aad jeceshahay inaad soo qaadatid ama aad kala xiriirto milkiilahaaga (lambarka taleefanka iyo cinwaanka) si aad u codsato in hantida laguu hayo ama laguu keydiyo. Haddii la codsado, kaydinta ayaa la bixin doonaa illaa soddon maalmood laga bilaabo taariikhda shabada ogeysiiska ee noqonayso meesha uu milkiilahaagu doorto, adiguna waxaad mas'uul ka noqon doontaa kharashyada kaydinta.

(f) Duruuf la'aan milkiilaha ma tuuri karo ama haddii kaleba wuxuu ku dhaqaaqi karaa kontoroolka hantida shaqsi ee ku hartay guryaha la degan yahay iyada oo aan ogolaansho rasmi ah laga helin kiraystaha. Haddii shuruudaha loo adeegsado hantida shakhsiyadeed loo arko inay ka tegeen aysan wali sii jirin, milkiiluhu xaq uma yeelan doono inuu tuuro ama haddii kontoroolo hantida.

(g) Marka laga reebo qodobbada qayb hoosaadka (h), haddii ay dhacdo khilaaf ka dhasha qodobbada qaybtan iyo kalmadaha heshiiska qoraalka ah, kalmadaha heshiiska ayaa maamuli doona.

(h) Iyada oo aan loo eegin wax bixin ah oo qaybtan ka mid ah liddi ku ah, haddii mulkiilaha uu marayo qodobka hoosaadka (b) (3) uu leeyahay aqoon dhab ah ama la ogeysiiyo ilaalinta kahortaga xadgudubka ee laga galay ilaalinta kiraystaha ama xubin katirsan Qoyska kiraystaha ugu dhow, mulkiiluhu waa inuu ka fogaadaa inuu tuuro ama haddii kale gacanta ku dhigo hantida shakhsi ahaaneed ee kiraystaha soddon maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska. Haddii la codsado, kaydinta waa in la bixiyaa ilaa soddon maalmood laga bilaabo taariikhda codsiga.

(i) Mulkiile guri kaas oo jebiya bixinta qaybtani waxay ku waajibeysaa magdhow saddex geesood ah, khidmad qareen macquul ah iyo qarashka maxkamada.

Qaybta 2aad. Ficilkani wuxuu dhaqan gelayaa 60 maalmood.

LA ANSIXIYAY--22-da Oktoobar, A.D. 2014.

TOM CORBETT

Xaqa aad u Leedahay inaad hesho Meel Aad u Wanaagsan oo Lagu Noolaan karo

Maxkamadda Sare ee Pennsylvania waxay xaqiijisay in degganayaashu xaq u leeyihiin meel wanaagsan oo ay ku noolaadaan. Damaanad qaadka guryaha kirada ah ee hufan ayaa loo yaqaan **Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo.**

Warranty(Damaanad) wuxuu ka dhigan yahay in heshiis ijaareed kasta oo ku yaal Pennsylvania (ha noqoto mid afka ah ama mid qoraal ah) ay jirto ballan (Warranty)(Damaanad qaadka) in mulkiiluhu bixin doono guri aamin ah, nadhiif ah, iyo caafimaad leh. Guri kiro ah waa inuu ahaadaa mid ku habboon in lagu noolaado, milkiilaha guriguna waa inuu sidaas ku hayaa muddada kirada oo dhan iyadoo la samaynayo wixii hagaajin lama huraan ah. Xitaa haddii uu kiraystuhu saxiixo heshiis kiro ah oo uu guriga ku qaadto "sida uu yahay", Warranty(Damaanada) ayaa ilaaliyaa qofka. **Xuquuqda guri lagu noolaan karo lagama waayi karo heshiiska kirada.** Xusuusnow, Warranty(Damaanadu) waxay ku jirtaa heshiiska kirada, ama in heshiisku sidaas leeyahay iyo in kale. Qoddob kasta oo heshiis ah oo isku dayaya in laga tanaasulo Daamanaadan waa mid aan la fulin karin.

Damaanadu uma baahna mulkiilaha inuu sameeyo dayactirka qurxin ah. Tusaale ahaan, mulkiiluhu loogama baahna inuu hagaajiyo rinjiga fiiqfiiqmay, ku rakibo rooga cusub, ama sameeyo waxyaabaha kale ee lagu qurxiyo ama la hagaajiyo. **Si kastaba ha noqotee, mulkiiluhu waa inuu hagaajiyaa ciladaha culus ee saamaynaya badbaadada ama awooda ku noolaanshaha qaybta ijaarka.**

Tusaalayaasha soo socdaa waa cilladaha lagu daboolo Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo:

- La'aan biyo kulul iyo/ama qaboow oo socda
- Nidaamka bullaacadda oo aan shaqaynaynin
- Aan awood ulehayn in lagu sugo guryaha kirada ah qufulo (albaabada, daaqadaha)
- Aan lahayn kuleyl kufilan xilliga qaboobaha
- Qaba cayayaan ama jiir
- Saqafka oo soo daroorinaya
- Sagxado, jaranjarooyinka, balkoon, iyo biraha la qabsado oo aan nabdoonayn
- Xadhko koronto oo aan ku filnayn (halis u ah dabka) ama koronto la'aan
- Awood la'aanta in si badbaado leh loo keydiyo cuntada sababtoo ah qeybta fariij oo jaban (marka mulkiiluhu mas'uul ka yahay dayactirka iyo hagaajinta firiijka)
- Qayb dhismeed aan amaan ahayn oo ka dhigaysa mid khatar leh in la dego dhismaha

Waa Maxay Kuleylka Ku Filan?

“Kuleyl ku filan” waxay kuxirantahay xeerarka dayactirka guryaha ee degmadaada. Waxaad u baahan doontaa inaad la xiriirto degmadaada si aad u aragto waxa shuruudaha looga baahan yahay kuleyl ku filan deegaankaaga. Degmooyin badan ayaa qaatay Xeerka

Dayactirka Guryaha Caalamiga ah oo ah halbeega dayactirka guryaha. Koodhkani guud ahaan wuxuu ubaahanyahay mulkiilayaasha guryaha inay soo bandhigaan nidaam kuleyl oo awooda inuu sii wado heerkulka ugu yar ee ah 68°F (20 ° C) inta lagu jiro bilaha jiilaalka. Philadelphia, milkiileyaasha guryaha waxaa looga baahan yahay inay lahaadaan nidaam kuleylka siiya oo ugu yaraan 68 digrii ah laga bilaabo bisha Oktoobar ilaa Abriil. Haddii kiraystuhu uu leeyahay xakameynta kuleylkooda ayagoo adeegsanaya qalabka joogteeyo heer-kulka, milkiilahu qasab kuma ahan inuu kuleylka ku hayo ugu yaraan 68 digrii ugu yaraan — taasi waxaa loo daayay ikhtiyaarka kiraystaha. Ka hubso waaxda hirgelinta xeerka deegaankaaga shuruudaha kululaynta ugu yar ee looga baahan yahay aaggaaga.

Maxaad Sameyni Haddii Unuggaagu Uusan habbooneyn in Lagu Noolaado?

Haddii dhibaatadu ay tahay mid daran oo ay tahay in lagu sameeyo jebinta **Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo,** waxaad xaq u yeelan kartaa inaad raadsato dawooyin ah hal ama wax kabadan. Qaad tallaabooyinka soo socda si aad u aasaasto oo aad u ilaaliso xuquuqahaaga:

- Waa inaad go'aamisaa in ciladdu faragelineyso ku noolaanshaha qaybtaada ijaarka (awoodaada in aad ku noolaanayso guriga ayaa ah mid aad u liidata).
- Markaad go’aamiso in ciladdu faragalinayso degenaanshahaaga, sawirro ka qaad dhibaatada. Haddii lagaa doonayo inaad timaado maxkamada, sawirada ayaa faa'iido kuu lahaan doona.
- **Waa inaad ogeysiisaa mulkiilaha dhibaatada. Haddii ay jiraan qodobo ku jira heshiiskaaga oo sharxaya sida loogu wargaliyo milkiilaha wixii ku saabsan ciladaha, hubi inaad si adag u raacdo nidaamka ogeysiiska.** Haddii aad la hadashid asaga ama ayada, iska hubi inaad kulasocoto qoraal ahaan oo aad nuqul ka haysatid warqada. Kireystayaasha, had iyo jeer waa wax fiican in lagu ogeysiiyo milkiilaha wixii cilado ah qoraal ahaan. Tani waxay ku siineysaa caddeynta aad u baahan tahay si aad u tusto milkiilaha in lagu ogeysiiyay xaaladaha cillada. (Fiiri **“Warqada Tusaalaha ah ee Milkiileyaasha”**)
- Waa inaad u ogolaataa milkiilaha **waqti macquul ah** inuu ku hagaajiyo xaalada cilladaysan. Waqti intee leeg ayaa ah waqti macquul ah? Ma jirto jawaab caalami ah. Macquulnimadu waxaa lagu go'aamin doonaa nooca cilada iyo haddii awooda ama saxida cillada ay kujirto gacanta mulkiilaha isla markaaba. Waqti macquul ah oo lagu hagaajiyo saqafka burburay waxaa lagu qiyaasi karaa toddobaadyo; laakiin kuleyl la'aan bilaha jiilaalka waa in lagu xaliyaa maalin ama labo maalmood gudahood ugu badnaan.
- **Waa inaad awoodid inaad tustid in mulkiiluhu uusan dooneyn ama uusan awoodin inuu ku hagaajiyo guriga waqti macquul ah gudaheed ka dib markii lagu siiyay ogeysiiska cillada kahor intaadan isticmaalin wax ka qabashada dhibaatada.**
- Haddii aad go'aansato inaad raacdo sixitaan ama sixitaan iskudhaf ah, waxaad u baahan doontaa inaad si taxaddar leh u sii wado oo aad si fiican diyaar ugu ahaato maxaa yeelay milkiilahaagu wuxuu qaadi karaa talaabooyin uu kirooyinka ku uruurinayo ama xitaa isku dayi karo inuu guriga kaa saaro. **Talo sharci ah oo habboon waa mid muhiim ah.** Sharciga Pennsylvania wuxuu u diidayaa milkiilahaaga inuu kaa saaro guriga iyadoo ah aargudasho maxaa yeelay waxaad u isticmaashay xuquuqdaada si sax ah iyadoo la raacayo damaanad qaadka guriga lagu noolaan karo. Waa lagaa saari karaa guriga haddii maxkamaddu ogaato inaad si aan sax ahayn u isticmaashay xallin isla markaana aad jebisay heshiiskaaga taas darteed.

Daaweynta Kiraystaha ee loogu talagalay Jebinta Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo

Waxaa jira dhowr dawooyin oo sharci ah oo loogu talagalay Jebinta Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo oo loo isticmaali karo keligiis ama iskudar ahaan:

1. **Jooji heshiiskaaga oo ka guur**
2. **Ha bixinin dhammaan ama ayadoo qayb ah kharashka kirada**
3. **Hagaaji oo ka jaro kharashka**
4. **Fayl garayso tallaabo sharciyeed si aad u raadsato magdhow**

KAHOR INTAADAN KU DHAQAAQIN XALLIN KASTA, MASKAXDA KU HAY WAXYAABAHA SOO SOCDA:

- Mid kasta oo ka mid ah xallalkan waxay leeyihiin halis la xiriirta. Mid kasta oo ka mid ah wuxuu sababi kartaa mulkiiluhu inuu isku dayo inuu guriga kaa saaro. Haddii mulkiilahaagu uusan bixinaynin guri kiro ah oo lagu noolaan karo, kuma saari karo iyadoo loo arko aargoosi markii aad si sax ah u isticmaasho mid ka mid ah xallalkaan. Laakiin weli wuu kaa saari karaa ijaarka bixin la'aan haddii aad kirada si aan habooneyn u hakisay ama aad u jabisay heshiiskii kirada siyaabo kale.
- Ka hor intaadan isticmaalin mid ka mid ah xallalkaan, waxaad u baahan kartaa inaad la xiriirto qareen ama ururka xuquuqda kiraystaha wixii talo sharci ah ee laxiriira xaaladaada. Hubso inaad qaadday tallaabooyinka saxda ah si aad u aasaasto oo aad u ilaaliso xuquuqahaaga. Waxaa jira xaddidyo quseeya xallalkaan iyo hanaankan. Mid kasta oo ka mid ah xallalkaan way adkaan karaan, duruuf kasta oo shaqsiyeedana way kala duwanyihiin. Talo sharci ah oo habboon waa mid muhiim ah.
- Hubso inaad caddeyn karto inay dhibaatadu jirto. Marqaati laga helo asxaabta iyo ehelkaaga waa la aqbali karaa, laakiin sawirraan si cad u muujinaya cilladaha aad rabto inaad tilmaamto ayaa ka fiican oo warqad ama ogeysiis ka yimid xeerka meelmarinta waa mid fiican.
- Had iyo jeer ka fikir u diyaar garoow haddii mulkiiluhu uu ku danbeeyo inuu maxkamadda kuu gudbiyo. Waxaad u baahan doontaa dukumiinti muujinaya cilada oo ka dhigaysa gurigaaga hoy aan lagu noolaan karin - sawirro, xeerka warbixinada kiisaska kormeerka, caddeyn inaad milkiilaha siisay ogeysiis kusaabsan ciladaha ayadoo qoraal ah, iyo caddeyn inaad siisay mulkiilaha waqti macquul ah oo uu ku sameeyo hagaajinta, caddeyn in hagaajinta aan la sameynin, oo sidaas darteed sharci ahaan aad xaq ugu leedahay inaad u isticmaasho mid ka mid ah xallalkaan.

Xallka #1: Jooji heshiiskaaga oo iska ilaali waajibaad kasta oo dheeraad ah oo ku saabsan bixinta kirada.

Kiraystuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu joojiyo heshiiska kirada oo uu ka baxo guriga haddii kiraystuhu uu ogeysiis ku siiyey cilladaha dhismaha ee mulkiilaha iyo waqti macquul ah ka dib, mulkiiluhu uusan doonayn ama awoodin inuu sameeyo hagaajinta.

Haddii aad go'aansato inaad isticmaasho talladan, **waa inaad** ka guurtaa guryaha ijaarka ah. Ma joojin kartid heshiiska kirada oo kadibna guriga aad kusii jirtid. Waad waayi kartaa carbuuntaada amniga waxaa lagu dacweyn karaa ijaar bixin la'aan haddii aadan ka bixin guriga. Dhamaan nidaamyada guri ka guurista waa in la raacaa oo ay ku jiraan ku wareejinta dhammaan furayaasha mulkiilaha.

Xallka #2: Hakinta dhammaan ama qeyb ah kharashka kirada ilaa cilladaha la xalliyo.

Sida uu dhigayo sharciga Pennsylvania, waad hakin kartaa kirada hadii aad cadeyn karto in qaybta guryuhu aan lagu noolaan karin oo ay tahay in la qaado talaabooyin sax ah oo lagu ogeysiinaya mulkiilaha dhibaatada iyo siinta mulkiilaha waqti macquul ah oo lagu xaliyo ciladaha sababay qaybta kirada inay noqo guri aan lagu noolaan karin. Ilaa iyo inta ay jiraan caddayn in qaybta guryuhu aan lagu noolaan karin, waa inaad leedahay difaac haddii milkiiluhu uu soo gudbiyo dacwad kasta oo sharci oo kusaabsan inaadan bixin kirada.

- Hubso inaad siisay mulkiilahaaga ogeysiis qoraal ah in dhibaatadu jirto.
- Hubso inaad u oggolaatay waqti macquul ah oo lagu sameeyo hagaajinta oo aad caddeyn karto inuu mulkiilahaagu ku guul darreystay inuu sameeyo hagaajinta aad dalbatay.
- La tasho qareen haddii aadan hubin sida loo sii wado, aad qabto walaacyo ku saabsan caddeynta ku xad gudubka Kafaala qaadida Sharciga, ama aad u baahan tahay macluumaad dheeri ah.

Immisa kharashka kirada ah ayaad hakin kartaa?
Ma jiro qaacido sax ah oo lagu go'aaminayo inta kharashka kirada ee aad sharci ahaan hakin karto. Hal dariiqo oo lagu xisaabiyo xaddiga lacageed waa in la ogaado inta gurigaaga aadan isticmaali karin iyo muddada intee le'eg.

Tusaale 1: Haddii aad leedahay abaarto shan qol ah oo aadan isticmaali karin mid ka mid ah qolalka muddo dhan bil saqafka oo soo daroorinaya awgeed, waxaad ka goyn kartaa 1/5 (shan-meelood hal meel) ama 20% oo ah kharaskkaaga kirada wixii ah khasaare ee 1/5 (shan-meelood hal meel) ee abaartada.

Tusaale 2: Haddii aadan kuleyl lahayn oo lagu qasbay inaad la joogtid saaxiib ama hudheel muddo toddobaad ah, waad ka goyn kartaa 1/4 (afar-meelood hal meel) ama 25% oo ah kharashka kirada wixii ah khasaaraha isticmaal la'aanta guriga hal toddobaad afartii.

Hakid Galinta Kharashka Kirada Escrow Account (Akoonka Kaydinta lacagta La Bixinayo)
In kasta oo sharcigu uusan u baahnayn in aad kiradaada aad hakisay inaad geliso akoon bangi ama akoonka kaydinta lacagta la bixinayo, waa fikrad fiican ah in sidaa la yeelo. Haddii aadan furan karin akoon bangi oo gaar ah, iska hubi inaad caddayn karto inaad lacagta kirada gooni u dhigtay. Tani waxay ku siin kartaa xoogaa ilaalin ah haddii mulkiilahaaga uu maxkamadda geeyo inaadan kharshka bixinin. Garsoorayaashu badanaa waxay weydiiyaan kiraystayaasha haddii ay galiyeen lacagta kirada ee la hakiyay akoonka kaydinta lacagta la bixinayo. Adigoo ku keydinaya lacagta akoon bangiga ah, waxaad u muujineysaa Xaakinka in aadan isku deyeynin inaad ku noolaato guri bilaa kiro ah.

Xallka #3. Hagaaji ciladaha kana jar kharashka hagaajinta kiradaada billaha ah.

Daaweyntani waxay u oggolaaneysaa kiraystuhu inuu hagaajiyo cilada ama uu saxo xaaladaha ka dhigaya guriga inaan lagu noolaan karin. Kiraystuhu wuxuu markaa ka jari karaa kharashka hagaajinta kirada. Qaddarka kharashka hagaajinta ee laga goyn karo kirada waa mid xadidan.

- Qaddarku waa inuu ahaadaa mid macquul ah oo lagama maarmaan ah si looga dhigo qaybta guryuhu mid lagu noolaan karo.
- Laguuma oggola inaad ka goyso kharashaadka ka dhiga qaybta guryuhu inay noqdaan kuwo la jecel yahay. Kaliya kharashaadka ku kallifaya inay ka dhigaan dhismaha hoyga mid aamin ah oo u hoggaansan dammaanad-qaadida hoyga lagu noolaan karo ayaa laga goyn karaa.
- Kahor intaadan bilaabin, ugu sheeg mulkiilahaaga ogeysiiska qaab qoraal ah inaad ku talajirto inaad ku dhaqaaqdo xallintan oo aad u gudbiso qiyaasta qiimaha.
- Waa inaad sugtaa waqti macquul ah kahor intaadan bilaabin.
- Waxaad u baahan doontaa inaad ogeysiiso mulkiilahaaga marka shaqadu dhamaato.
- Xulashadani adiga ayey kuu fiicnaan kartaa haddii dhibaatadaadu ay tahay wax gaar ah oo uu qofka hagaajiyo uu samayn karo kharashka hagaajintuna ay ka yaraan doonto waxa aad ku bixiso hal bil kirada.
- Hubso inaad hayso dhammaan risiidhada wixii kharash ah ee ku baxa oo aad milkiilaha siiso.

Xallka #4: Soo gudbi ficil sharciyeed si aad u soo ceshato kharashka hagaajinta, dib u soo ceshashada kirada, iyo/ama magdhow wixii waxyeelo kale ah ee kusoo gaadhay intii unugga guryuhu aysan ahayn kuwo lagu noolaan karo.

Tan waxaa laga yaabaa inay kuu tahay ikhtiyaar kuu wanaagsan haddii aad horey lacagtaada kusamaysay hagaajinta ama haddii aad u maleyneyso inaad u qalantid dhimis ijaar oo ah in la hawlgaliyo maxaa yeelay gurigu wuxuu lahaa arrimo culus oo dhanka kunoolaanshaha ah.

- Waad qaadan kartaa tallaabadan sharciga ah haddii aad wali ku nooshahay guriga ama aad ka guurayso.
- Culeyska ayaa saaran kiraystaha si uu u caddeeyo in Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo la raacay iyo in kharashaadka ama khasaaraha kale ay la kulmeen sababtuna tahay milkiilaha oo jabiyay qodabka Dammaanad qaadista in Gurigga Lagu noolaan Karo.

Yaa Mas'uul Ka Ah Burbinta?

Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo ayaa u baahan milkiilaha guriga inuu siiyo kiraystayaasha xaalado badbaado iyo nadaafad leh. Abaarto ama aqal qaba cudurka dhiqlaha, baranbarada, injir boodada, jiirarka ama qashinqubka kale ma ahan mid amaan ah oo nadaafadna leh. Haddii milkiilahaagu diido inuu shaqaaleeyo qof burburiyo, waxaad laxiriiri kartaa waaxda Hirgalinta Xeerarka deeggaankaaga. Sarkaalka xeerku waa inuu u soo baxo guriga si uu u baaro oo uu ugu soo gudbiyo milkiilaha haddii uu jiro wax cayayaan oo guriga leeyahay. Haddii milkiiluhu diido inuu ciribtiro, waad awoodi kartaa

inaad sameyso xallal sharciyeed si aad adigu ula tacaasho cayayaanka. Eeg *Xallalka Kiraystaha ee Loogu Jeedo Jebinta Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo.*

Hagaajinta aan Lagu Daboolin Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo

Hagaajinta qurxinta sida dib-u-rinjiyaynta, bedelidda rooga, cusbooneysiinta mutuleelka, iyo rakibida armaajooyinka la casriyeeyay kuma jiraan Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo. Had iyo jeer hubi heshiiskaaga kirada. Haddii heshiiskaagu aanu wax ka qaban dib urinjiyaynta guriga iyo haddii aad wax ka beddesho xaaladda guriga adoo dib u rinjiyaynaya, markaa guud ahaan, mulkiiluhu mas'uul **kama ahan** inuu dib kuu soo celiyo kharashyada, laakiin mulkiiluhu wuxuu kaaga baahan karaa inaad ku celiso guriga xaaladdiisii hore markii aad guurto. Hel ogolaanshaha milkiilahaaga (la doorbidayo qoraal ahaan) ka hor intaadan dib urinjiyaynin ama wax isbeddel ah ku sameynin guriga si aad uga fogaato dhibaatooyinka.

WARQAD TUSAALE AH

DHIBAATOOYINKA HALISTA AH EE SAAMAYNAYA DEGANAANSHAHA

Magacaaga
Ciwaankaaga
Taariikh

Magaca Mulkiilaha
Cinwaanka Mulkiilaha

Gacaliye *{Enter Landlord's Name (Gali Magaca Mulkiilaha)}:*

Waxaan warqad kuugu soo qorayaa wax ku saabsan hagaajinta looga baahan yahay abaartada/guriga *(mid dooro)* oo ku yaal *{enter address(Gali ciwaanka)}* oo aan adiga kaa kireysanayo. Dhibaatada gaarka ah ee ay tahay in la hagaajiyo ayaa ah:

Samee liiska: *(Tusaalooyinka hoos ayaa lagu taxay)*
Biyo kulul la'aan
Dhibaatada tuubooyinka *(cilada khaaska sheeg)*
Kuleyl la'aan
Saqafka jeexan, iwm.

Waxaan rumeysanahay in cilladdaani yihiin kuwo jabiyey heshiiskeeni kirada noo ahaa iyo ku xadgudubka Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo.

Waan kuu mahadcelin lahaa haddii aad sida ugu dhaqsaha badan u samayn lahayd hagaajinta. Haddii shuruudahan aan lagu sixi karin waqti macquul ah gudahooda, waxaan damacsanahay inaan isticmaalo xuquuqdayda sharciga ah si aan u dhimo kirada, aan sameeyo hagaajinta naftayda oo aan ka jaro kharashka kirada, ama aan hakiyo lacagtayda kirada, iwm. *(dooo mid)*

Waxaan kaaga mahadcelinayaa tixgelintaada degdeg ah ee arrintan.

Si daacadnimo kudheehan,

Saxiixaad
Qor Magacaada
Macluumaadkaaga Xiriirka

WARQAD TUSAALE AH

XAQIIJINTA HAGAAJINTA LOO BAAHAN YAHAY

Magacaaga
Cinwaankaaga

Taariikhda

Magaca Mulkiilaha
Cinwaanka Mulkiilaha

Gacaliye *{Enter Landlord's Name (Gali Magaca Mulkiilaha)}:*

Warqaddani waxaa loo qoray inay xaqiijiso wadahadalkeeni *{telephone}* markay ahayd *{date}* kaas oo aan kugula socodsiiyay in hagaajinta soo socda looga baahan yahay abaartadayda/gurigayga *(dooro mid)* oo ku yaala
{address(ciwaanka)}.

Dhibaatada gaarka ah ee ay tahay in la hagaajiyo ayaa ah:

Samee liiska: *(Tusaalooyinka hoos ayaa lagu taxay)*
Biyo kulul la'aan
Dhibaatada tuubooyinka *(cilada khaaska sheeg)*
Kuleyl la'aan
Saqaf jeexan, iwm.

Waxaad balanqaaday in hagaajinta lagu dhamayn doono *{enter date agreed(gali taariikhdi lagu heshiiyay)}*.
Waad ku mahadsantahay iskaashiga aad arintan ka sameysay.

Si daacadnimo kudheehan,

Saxiixaad
Qor Magacaada
Macluumaadkaaga Xiriirka

WARQAD TUSAALE AH

HAGAAJI OO KA JARO KHARASHKA

Magacaaga
Cinwaankaaga

Taariikhda

Magaca Mulkiilaha
Cinwaanka Mulkiilaha

Gacaliye *{Enter Landlord's Name (Gali Magaca Mulkiilaha)}:*

Waxaan kuugu soo qoraaya inaan kaala hadlo wax ku saabsan hagaajintii abaartada/guriga looga baahan yahay *(dooro mid)* oo ku yaal *{enter address (gali cinwaanka)}* oo aan adiga kaa kireeyey.

Dhibaatooyinka gaarka ah ee ay tahay in la hagaajiyo waa:

Samee liiska: *(Tusaalooyinka hoos ayaa lagu taxay)*
Biyo kulul la'aan
Dhibaatada tuubooyinka *(cilada khaaska sheeg)*
Kuleyl la'aan
Saqaf jeexan, iwm.

Sidaad xasuusato, waxaan dhibaatooyinkaan uga wada hadalnay markay ahayd *{enter date of discussion (gali taariikhda wadahadalka)}. (Adeegso khadkan keliya haddii ay khusayso.)*

Waxaan rumeysanahay in cilladdaani yihiin kuwo jabiyey heshiiskeeni kirada noo ahaa iyo ku xadgudubka Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo.

Haddii xaaladahan aan lagu sixin *{enter a number of days (gali dhowr maalmood)},* waxaan damacsanaa inaan isticmaalo xuquuqdayda sharciga ah si aan u sameeyo hagaajinta lagama maarmaanka u ah oo aan ka jarto kharashka lacagtayda kirada. *(Ku dar qiimeyn kasta oo aad lahaan karto oo muujinaya kharashka la rajeynayo ee hagaajinta.)*

Waxaan kaaga mahadcelinayaa tixgelintaada degdeg ah ee arrintan.

Si daacadnimo kudheehan,

Saxiixaad
Qor Magacaada
Macluumaadkaaga Xiriirka

WARQAD TUSAALE AH

HAKINTA KIRADA DHAMAAN/QAYB AHAAN

Magacaaga
Cinwaankaaga

Taariikhda

Magaca Mulkiilaha
Cinwaanka Mulkiilaha

Gacaliye *{Enter Landlord's Name (Gali Magaca Mulkiilaha)}:*

Waxaan kuugu soo qoraaya inaan kaala hadlo wax ku saabsan hagaajintii abaartada/guriga looga baahan yahay *(dooro mid)* oo ku yaal *{enter address (gali ciwaanka)}* oo aan adiga kaa kireysanayo. Dhibaatooyinka gaarka ah ee ay tahay in la hagaajiyo waa:
Samee liiska: *(Tusaalooyinka hoos ayaa lagu taxay)*
Biyo kulul la'aan
Dhibaatada tuubooyinka *(cilada khaaska sheeg)*
Kuleyl la'aan
Saqaf jeexan, iwm.

Sidaad xasuusato, waxaan dhibaatooyinkaan uga wada hadalnay markay ahayd *{enter date of discussion (gali taariikhda wadahadalka)}. (Adeegso khadkan keliya haddii ay khusayso.)*

Waxaan rumeysanahay in cilladdaani yihiin kuwo jabiyey heshiiskeeni kirada noo ahaa iyo ku xadgudubka Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo.

Haddii xaaladahan aan lagu sixin *{enter a number of days (gali dhowr maalmood)},* waxaan damacsanaa inaan isticmaalo xuquuqdayda sharciga ah si aan hakad ugaliyo qaar ama dhamaan kiradayda bilaha ah ilaa waxyaabahaasi la saxo.

Waxaan kaaga mahadcelinayaa tixgelintaada degdeg ah ee arrintan.

Si daacadnimo kudheehan,

Saxiixaad
Qor Magacaada
Macluumaadkaaga Xiriirka

WARQAD TUSAALE AH

JOOJINTA HESHIISKA KIRADA SABABA DEGANAANSHAHA AWGEED AH—WARQADI 1AAD

Magacaaga
Cinwaankaaga

Taariikhda

Magaca Mulkiilaha
Cinwaanka Mulkiilaha

Gacaliye *{Enter Landlord's Name (Gali Magaca Mulkiilaha)}:*

Waxaan kuugu soo qoraaya inaan kaala hadlo wax ku saabsan hagaajintii abaartada/guriga looga baahan yahay *(dooro mid)* oo ku yaal *{enter address (gali ciwaanka)}* oo aan adiga kaa kireysanayo.

Dhibaatooyinka gaarka ah ee ay tahay in la hagaajiyo waa:

Samee liiska: *(Tusaalooyinka hoos ayaa lagu taxay)*
Biyo kulul la'aan
Dhibaatada tuubooyinka *(cilada khaaska sheeg)*
Kuleyl la'aan
Saqaf jeexan, iwm.

Waxaan rumeysanahay in cilladdaani yihiin kuwo jabiyey heshiiskeeni kirada noo ahaa iyo ku xadgudubka Kafaala qaadida Sharciga ah ee In Guriga Lagu noolaan Karo.

Haddii xaaladahan aan lagu sixin *{enter a number of days (gali dhowr maalmood)},* waxaan damacsanaa inaan isticmaalo xuquuqdayda sharciga ah si aan uga boxo dhismaha.

Si daacadnimo kudheehan,

Saxiixaad
Qor Magacaada
Macluumaadkaaga Xiriirka

WARQAD TUSAALE AH

JOOJINTA HESHIISKA KIRADA SABABA DEGANAANSHAHA AWGEED AH—WARQADI 2AAD

Magacaaga
Cinwaankaaga

Taariikhda

Magaca Mulkiilaha
Cinwaanka Mulkiilaha

Gacaliye *{Enter Landlord's Name (Gali Magaca Mulkiilaha)}:*

Tani waa inaan kugula taliyo in aan ka bixi doono abaartadayda /aqalkayga *(dooro mid)* oo ku yaala *{enter address (gali cinwaanka)}* markay tahay *{enter date (gali taariikhda)}.* Waan raacay dhammaan nidaamyadii guuritaanka ee la ii sheegay.

Cinwaankeyga fariimaha laygusoo gudbin karo waa *{enter new address (gali cinwaanka cusub)}.* Fadlan ku soo celi carbuuntayda amniga cinwaanka kor ku xusan 30 maalmood gudahooda kadib markaan ka baxo dhismaha.

Si daacadnimo kudheehan,

Saxiixaad
Qor Magacaada
Macluumaadkaaga Xiriirka

CARBUUNTA AMNIGA

Carbuunta amniga waa lacag uu leeyahay kiraystaha laakiin mulkiiluhu hayo si loogu ilaaliyo waxyeelada. Kiraystuhu wuxuu mas'uul ka yahay bixinta kirada muddada heshiiska oo dhan. Markuu heshiisku waqtigiisa dhamaado, kiraystuhu waa in loo soo celiyaa carbuunta amniga marka laga jaro wixii waxyeelo ah ee soo gaadhay guriga.

Dhammaan ama qayb ka mid ah carbuuntaada amniga ayaa la hakin karaa dhamaadka heshiiskaaga kirada haddii aad:

- waxyeeleeyo gaarsiiso dhismaha;
- ku guuldareysato inaad si sax ah u nadiifiso;
- ku guuldareysato inaad bixiso kiradaada ugu dambeysa ama wax kastoo kirada ah;
- ku guul darreysato inaad siiso ogeysiiska saxda ah mulkiilaha inaad ka guureyso.

Iyadoo aan la helin heshiiska milkiilaha, carbuunta amniga looma isticmaali karo sida kirada bishii ugu dambeysay. Carbuunta amniga looma adeegsan doono in lagu bixiyo magdhawga kiraystayaasha kale ka hor intaadan u soo guurin ama uqfuqa iyo dildilaaca caadiga ah ee ku imaada guriga. Eeg *Soo celinta Carbuuntaada Amniga*

Xadidnaanta Xaddiga Carbuunta Amniga

Sharciga Pennsylvania wuxuu xadidayaa xaddiga carbuunta amniga ee milkiiluhu dalban karo. Inta lagu jiro sanadka koowaad ee heshiiska, carbuunta amniga kama badnaan karo kirada labo bilood. Mulkiiluhu wuxuu weydiisan karaa kiraystaha inuu bixiyo carbuunta oo ay weheliso “bishii lasoo dhaafay”. Iyadoo aan loo eegin waxa milkiilaha uu ugu yeeri karo, lacag “kirada bishii laso dhaafay” bixintan wali waa qeyb ka mid ah lacagta carbuunta amniga ugu badan ee labada bilood ee ugu horreysa sanadka koowaad.

Inta lagu jiro sanadka labaad ama inta lagu jiro dib u cusboonaysiinta heshiiska kirada asalka ah, carbuunta amniga kama badnaan karto kirada hal bil. Haddii kirada kireystaha ay koradho, mulkiiluhu wuxuu kaloo kordhin karaa carbuunta amniga in la'eg kirada hal bil lee sicirka cusub shanta sano ee ugu horreysa ee heshiiska kirada. Shan sano kadib, mulkiiluhu ma kordhin karo carbuunta xitaa haddii kirada la kordhiyo.

Haddii kiraystaha uu bixiyay carbuunta amniga ee laba bilood (ama carbuunta amniga ee hal bil iyo “kirada bishii lasoo dhaafay”), marka sannadka ugu horreeya kadib, kiraystuhu wuxuu waydiin karaa mulkiilaha inuu soo celiyo qadarka lacagta la hayo ee ka badan kirada hal bil. Tan waxaa lagu sameeyaa adigoo qoraya warqad lagu codsanayo lacagtan iyo haynta nuqul ah warqadda. Waraaqda waa in laguugu soo diro boosto la xaqiijiyay, "rasiid soo celin ayaa la codsaday," sidaa darteed waxaa jira caddeyn ah in mulkiiluhu helay. Kiraystuhu waa inuu la socdaa boostada la xaqiijiyay ayadoo loo diraayo waraaqo joogto ah haddii kiraystuhu uusan ka helin rasiid saxiixan oo la soo celiyay xafiiska boostada.

Dulsaarka Carbuunta Amniga

Haddii in ka badan $100 oo carbuunta amniga la ururiyay:

1. Lacagaha waa in lagu shubaa akoon gaar ah
2. Akoonku waa inuu ahaadaa hay'ad ay maamusho Pennsylvania ama masuuliyiinta bangiyada federaalka
3. Mulkiilahu waa inuu ogeysiiyaa kiraystaha isagoo qoraal ah oo wata magaca iyo cinwaanka la dhigayo carbuunta (bangiga) iyo xaddiga dhigaalka
4. **Sannadkii labaad kadib,** dulsaarka laga helay lacagta kiraystaha (wax ka yar 1% khidmad maamul oo milkiile ah) waa in la siiyaa kiraystaha sannad-guurada taariikhda heshiiska kiraysiga
5. Sharcigu ma qeexayo inta dulsaarka kiraystaha la rabo inuu helo

Xusuusnow, sicirada dulsaarka maanta aad ayuu u yar yahay. Sidaa darteed, kadib markii milkiiluhu uu ka jarto khidmada 1%, waxaa laga yaabaa inaysan jirin wax dulsaar ah oo loo aanaynayo kiraystaha. Si kastaba ha noqotee, arrimo la xiriira sameynta ganacsi wanaagsan, mulkiiluhu waa inuu ku ogeysiiyaa kireystaha qoraal ahaan inaysan jirin wax dulsaar ah oo laga rabo.

Soo Celinta Carbuuntaada Amniga

Soddon (30) maalmood gudahooda kadib heshiiska kiraysiga, mulkiiluhu waa inuu siiyaa kiraystaha:

1. Liis qoran oo ah wixii magdhaw ah oo milkiiluhu ku andacoodo inuu kiraystuhu mas'uul ka yahay, iyadoo la bixinayo farqiga u dhexeeya lacagta carbuunta amniga iyadoo ay weheliso (haddii ay wax un jiraan) iyo lacag loo isticmaalay in lagu bixiyo waxay waxyeelada gaartay **ama**,
2. Jeeg dhan cadadka carbuunta amniga.

Haddii milkiiluhu ku guuldarreysto inuu sameeyo mid ka mid ah waxyaabaha kor ku xusan 30 maalmood gudahood, wuxuu iska daayay xaquuqda inuu sii hakiyo carbuunta amniga ama dulsaarka wuxuuna ka tanaasulay xaquuqda uu kiraystaha maxkamada ugaga dacwoon karo si uu ubixiyo magdhow. Maalinta 31aad, kiraystuhu wuxuu ku dacwayn karaa mulkiilaha **laba jibaar** caddadka lacagta carbuunta amniga ee lagu haayo qaybta kaydinta lacagta la bixinayo oo ay weheliso dulsaarka (haddii ay wax un jiraan). Xusuusnow haddii uusan kiraystuhu bixinin cinwaanka gudbinta ama uu soo celiyo furayaasha, milkiilaha guriga laguma qaban karo 30-ka maalmood ee kama dambaysta ah.

Kharashka Waxyeelada ee Lagusoo rogay Carbuuntaada Amniga

Mulkiiluhu waa inuusan kusoo dallicin kiraystaha wixii ah fuqfuqa iyo dildilaaca caadiga ah. Tusaale ahaan, haddii mulkiiluhu go'aansado in guryuhu u baahan yahay dib loo rinjiyeeyo dhamaadka heshiiska kiraystaha, kiraystha laguma dallaci doono dib u rinjiyaynta ilaa kiraystuhu sababay wax badan fuqfuqa caadiga ah mooyee.

Waa maxay Fuqfuqa iyo Dildilaaca Caadiga ah?

Fuqfuqa iyo dildilaaca caadiga ayaa ah xumaanshaha caadiga ah ee guriga ayadoo ay ugu wacan tahay isticmaalka maalinlaha ah ee caadiga ah. Ma ahan dhaawac kusoo gaadhay waxyeelo ama dayacaad. Waxaa jira farqi u dhexeeya fuqfuqa iyo dildilaaca caadiga ah iyo waxyeelada lagu sameeyay guryaha. Roogga duf kacay waa fuqfuqa iyo dildilaaca caadiga ah. Gubashooyinka ama wasakh kutaalo rooga waa waxyeelo ay sababtay dayacaad. Doorsoomida ama rinjiga huruudda ah waxaa loo arkaa inay tahay fuqfuqa iyo dildilaaca caadiga ah. Wasaqda weyn ee rooga ama godadka darbiga ku yaal ayaa noqon karto in loo magdhabo milkiilaha.

Maxaa Carbuunta Amniga Loo Adeegsan Karaa?

Milkiilaha gurigaagu wuxuu haysan karaa qaar ama dhammaan carbuuntaada amniga si uu ugu sameeyo hagaajinta wixii waxyeelo ah oo aan ahayn fuqfuqa iyo dildilaaca caadi ah. Milkiilaha gurigaagu wuxuu uhaysan karaa carbuuntaada amniga si uu ugu daboolo wixii kiro ah ee aan la bixin dhamaadka waqtiga ijaarka. Carbuunta amniga ayaa waliba laga yaabaa inaad wayso haddii aad heshiiska kirada jabiso. Mulkiiluhu wuxuu kugu dallaci karaa inaad nadiifiso qaybta kirada ka dib guuritaanka haddii aad sidaas sameyn weyday — laakiin khidmaddu waa inay macquul noqotaa oo kaliya dib ugusoo celisaa guriga sidii ay ahayd ka hor intaadan soo dagin.

Waa inaadan masuul ka noqon waxyeelada ay sababeen kireeysteyaashii hore. Adigoo adeegsanaya **Liiska-hubinta Kormeerka ee Qaybta Kirada,** kiraystuhu wuxuu ogaan karaa wixii khasaare ah ee ay qabtay dhismaha kirada ka hor intaadan kusoo guurin qaybta. Caddayn ah dokumenti, markhaatiyaal, iyo sawirro ayaa si gaar ah waxtar ugu leh aasaasida xaqiiqda in waxyaalada ay jiray ka hor kiraysiga. Caddaynta noocan ahi waa mid aad u qiimo badan haddii uu kiraystuhu doonayo inuu dacwad ka gudbiyo milkiilaha si uu uga soo ceshado carbuunta amniga ee sida khaldan looga haysto.

Tallaabooyinka Aad Ku Helayso Carbuuntaada Amniga Markaad Guurto

- **Sii mulkiilaha ogeysiis sax ah oo ah inaad guur doontid.**
- **Ogeysiiskaan waa inuu ahaadaa mid waafaqsan shuruudaha heshiiska ijaarkaaga.** Waxaad u baahan doontaa inaad aqriso heshiiskaaga kirada si aad u aragto halka Ogeysiinka Guri ka bixida la keenayo iyo immisa ogeysiis ayay tahay in la bixiyo si aad ujoojiso heshiiskaaga kiraysiga.
- **Hubso inaad kusiiso mulkiilaha cinwaankaaga cusub qoraal ahaan waqtiga guuritaanka ama ka hor intaadan guurin.** Waa inaad tan sameysaa xitaa haddii aan sidaas laguugu sheegin heshiiskaaga kiraysiga. Eeg *Waraaqad Tusaale ah—Ogeysiis Inaad Ka Baxdo/Ciwaanka Loosoo Gudbinaya Soo celinta Carbuunta Amniga.*
- Waxaa ugufiican in ogeysiiskaan laguugu soo diro boosta la xaqiijiyay, “risiit soo celin ayaa la codsaday”. Haddii aadan hubin waxa cinwaankaaga cusub uu noqon doono, mulkiilahaaga sii cinwaanka uu leeyahay qof ehelka ah. Hayso nuqulada dhammaan waraaqaha aad dirto, rasiidhada loogu diro waraaqaha boostada la xaqiijiyay, iyo risiidhada lasoo celiya.
- **Nadiifi qaybta guriga inta ugu macquulsan ka hor intaadan ka guurin.** Hayso risiidhada kirada ama iibsashada qalab kasta oo nadiifin loo isticmaalo, tusaale ahaan, kireysiga

nadiifiyaha isticmaala uumiga oo lagu nadiifinayo rooga. Xusuusnow inaad nadiifiso gudaha makiinada cuntada lagu kariyo iyo firiijka, oo tuur wixii qashin ah. Waxna ha uga tagin.

- **Hubso in aan lagugu lahayn wax kiro ah.**
- **Isku day in milkiilahaaga guriga kormeero adigoo la socdo.**
- **Sawiro ka qaad dhismayaasha madhan.** Tani waa waqtigii la kormari lahaa sawiradaada, liistada-hubinta, ama dukumiintiyada kale ee wixii waxyeelada qabay ku qoran yihiin ee aad ka diyaarisay markii aad kusoo guurtay abaartada ama guriga.
- **U celi furayaasha mulkiilaha.** Haddii ay suurtagal tahay, hel risiid wixii lacag ah ee lagu lahaa ee lasiiyay mulkiilaha waqtigan.

Xusuusnow, haddii ogeysiis sax ah aan la siinin, waxaad suurogal u tahay inaad jabiso heshiiskaaga kirayida oo waxaad waayi kartaa carbuuntaada amniga. Haddii aadan si rasmi ah u dhammaynin heshiiskaaga kirada, kiro lagugu leeyahay, ama aadan celinin furayaasha, milkiilahaaga ayaa diidi kara inuu kusoo celiyo carbuuntaada amniga.

Waxa la Sameeyo Haddii Mulkiilahaagu Uu Soo Celinin Carbuuntaada Amniga

Haddii mulkiilahaagu ku guuldaraysto inuu soo celiyo carbuunta amniga oo uu ku siiyo liis qoran oo ah waxii waxyeelo soo gaaray soddon (30) maalmood gudahood, ama haddii mulkiiluhu ku guul darreystay inuu ku siiyo farqiga u dhexeeya cadadka carbuunta amniga iyo magdhawga waxyeelada dhabta ah ee soo gaartay guriga kirada soddon (30) maalmood gudahood, milkiiluhu wuxuu ka tanaasulay:

- Dhammaan xuquuqaha lagu hayo qayb kasta oo ka mid ah carbuunta amniga (oo ay ku jiraan dulsaarka) **iyo**
- Dhammaan xuquuqaha uu ku dacwayn karo kiraystaha wixii waxyeelo ah ee uu ugaystay qaybta ijaarka (si kastaba ha noqotee, mulkiiluhu wuxuu wali ku dacweyn karaa kiraystaha aruurinta kirada aan la bixin ama jabinta heshiiska kirada).

Waxaad ka xereyn kartaa cabasho madani Maxkamada hoose ee Degmooyinka waxaadna ku dacwayn kartaa mulkiilaha laba jibaar caddadka lacagta carbuunta amniga (oo ay kujirto dulsaar, haddii lagu dabaqi karo). Mulkiiluhu awood uma yeelan doono inuu fayl garaysto sheegashada magdhowga.

Haddii mulkiiluhu ku siiyay liiska magdhowga iyo lacag soo celin soddon (30) maalmood gudahooda oo aadan ku raacsanayn caddadka magdhowyada, waxaad cabasho ka fayl garaysan kartaa maxkamadda hoose ee Dagmooyinka. Waa inaad caddeysaa in mulkiiluhu si aan habooneyn kugu dalacay waxyeelada. Mar labaad, sawirrada, liiska-hubinta, iyo dukumiintiyo kale ayaa waxtar u leh hawshan. Mulkiilaha gurigu **wuxuu** xaq u leeyahay inuu xareysto dacwad ka dhan ah adiga.

Waa inaad kubixisaa khidmadaha xaraynta Maxkamada hoose ee Degmooyinka si loo fayl gareeyo cabasho madani ah; hase yeeshe, waad waydiin kartaa mulkiilaha inuu kuu soo celiyo kharashyadan lagu dalacay. Haddii go'aanka Garsooraha uu adiga kugu raaco, ujurada xareynta iyo kharashaadka waxaa bixin kara milkiilaha. Haddii aad aado Maxkamada, waa inaad keentaa dukumiintiyada soo socda (haddii ay jiraan):

- Heshiiskaaga kirada oo qoraal ah
- Diiwaano ama caddeyn inaad soo celisay furayaasha
- Diiwaano ama caddeyn inaad siisay mulkiilaha cinwaan ay tahay waxkasta laguugu soo gudbiyo
- Nuqul wixii waraaqo ah ee aad usoo dirtay adigoo ka codsanaya dib uso celinta carbuunta amniga
- Nuqul waraaq kasta oo ka timid milkiilaha oo sharraxaya sababta lacagta aan lacagta carbuunta amniga oo dhamaystiran aan loo soo celinin.
- Dhammaan rasiidhada kirada (ama jeegagga la baajiyay)
- Rasiidhada carbuunta amniga (ama jeeg la baajiyay)
- Liiska wixii waxyeelada qabay markii aad kusoo guurtay
- Sawirro ama fiidiyoow (u diyaar garow inaad sheegto cidda qaadaday iyo goorta la qaaday)
- Markhaatiyaasha ku arkay adigoo bixinaya carbuunt, iyo/ama kuwa yaqaana xaalada gurigaaga markii aad kusoo gurtay ama ka guurtay

Haddii aadan siinin cinwaan fariimaha lagusoo gudbiyo, wali waxaad xaq u leedahay carbuunta amniga. Si kastaba ha noqotee, sababta oo ah dhibaatada milkiilaha ku haysata inuu ku raadiyo, mulkiilaha qasab kuma aha inuu ku soo celiyo 30 maalmood gudahood.

Qodob kasta oo heshiis ah oo sheegaya in aad ka tanaasushay xuquuqdani ma ahan mid la fulin karo oo sidaas darteedna maran.

WARQAD TUSAALE AH

OGEYSIIS INAAD KA BAXDO/CIWAANKA LOOSOO GUDBINAYA SOO CELINTA CARBUUNTA AMNIGA

Magacaaga
Cinwaankaaga

Taariikhda

Magaca Mulkiilaha
Cinwaanka Mulkiilaha

Gacaliye *{Enter Landlord's Name (Gali Magaca Mulkiilaha)}:*

Iyadoo la raacayo 68 P.S.§250-512(e), Waxaan ku siinayaa cinwaanka aad fariimaha igusoo gudbin karta ee soo socda qoraal ahaan:

{Enter Name Street Address City/State/Zip (Gali Magaaladda Cinwaanka Wadada Magaalada/Gobolka/Zip-ka)}

Heshiiskeygu wuxuu dhamaanayaa markay tahay *{enter date (gali taariikh)}.* Waxaan diyaar u noqon doonaa kormeerka ugu dambeeya ee guriga waqtigaada kuugu habboon inta lagu jiro usbuuca ugu dambeeya ee ay tahay *{enter date (gali taariikh)}.* Fadlan ila soo xiriir si aan waqti ugu sameeyo kormeerka.

Fadlan igusoo gudbi carbuuntayda oo dhan ama haraaga marka liiska wixii waxyeelo gaaray ee la sheegtay laga bixiyo carbuuntayda amniga oo ay la socoto dulsaar ururay cinwaanka kor ku xusan muddo xaddidan oo sharci ah oo ah 30 maalmood.

Si daacadnimo kudheehan,

Saxiixaad
Qor Magacaada
Macluumaadkaaga Xiriirka

KORDHINTA KIRADA

Pennsylvania ma lahan sharci kontoroola kirada. Mulkiileyaasha guryaha ayaa laga yaabaa inay sare u qaadaan kirada inta ay doonayaan. Si kastaba ha noqotee, isbeddelada waa in lagu sameeyaa si waafaqsan heshiiskaaga (heshiiska kiradaada).

1. Kordhinta kirada waa inay raacdaa nidaamyada ogeysiiska ee saxda ah ee lagu sheegay heshiiska qoraalka ama hadalka ah.
2. Mulkiilaha gurigu kor uma qaadi karo kirada badhtamaha muddada heshiiska kirada haddii aadan ogolaan in kirada la kordhiyo.
3. Mulkiiluhu kor uma qaadi karo kirada ayadoo u usamaynayo aargudashada sababta oo ah kiraystuhu wuxuu isticmaalay xuquuq sharci ah. Mulkiilaha looma oggola inuu kor u qaado kirada sababtoo ah kirayste wuxuu soo gudbiyey cabasho takoor ama la xiriir xeerka meelmarinta. Haddii kiradaada kor loo qaado sababta oo ah waxaad gudbisay cabasho takoor guriyeed, waa inaad u sheegtaa hay'adda halka aad ka gudbisay cabashada.

GOOYNTA ADEEGGA

Haddii aad hesho ogaysiis in adeegyadaada la gooyn doono, waxaad u baahan tahay inaad si dhakhso leh wax uga qabato si aad u ilaaliso xuquuqahaaga. Way adagtahay in adeegga dib loo soo celiyo kadib markii la gooyo. Si kasta oo ay tahay cidda mas'uul ka ah bixinta adeegyada, shirkadda adeegga ma gooyn karto adeegga iyadoon waxyaabaha soo socdaa la sameyn:

- Ogeysiis 10 cisho ah kahor intaan la gooynin
- Isku day inay kula soo xiriiraan ama la xiriiraan qof weyn oo gurigaaga katirsan si shaqsi ahaan ah ugu yaraan 3 maalmood ka hor intaan gooynin
- Isku day inay kula soo xiriiraan ama la xiriiraan qof weyn oo gurigaaga katirsan waqtiga la gooynayo
- Inta lagu jiro bisha Diseembar illaa Maarso, haddii shirkaddu aysan la sameynin xiriir shaqsiyeed kahor joojinta, waa inay ku dhejiso ogeysiis meel muuqata oo gurigaaga ah oo dhahaysa adeeggaada waa la gooyn doonaa waana inay ku siiso ugu yaraan 48 saacadood oo ogeysiis ah

Ka dib markii ogeysiis 10-maalmood ah ay siiyo kiraystaha shirkadda adeegga, shirkadda waxay heysataa 60 maalmood oo ay gooyn karto adeegga kireystaha iyadoon ogeysiis kale oo 10-maalmood ah la bixin.

Haddii shirkadda adeegga ay joojiso adeegga iyadoon ogeysiis hore la siinin, waxay jebisay sharciga. La xiriir shirkadda adeegga oo dalbo in adeegga si dhakhso leh laguugu soo celiyo. Codso inaad la hadasho kormeeraha oo qor magaca qofka aad la hadlayso. Haddii loo baahdo, ka wac Public Utility Commission (Guddiga Adeegga Dadweynaha) taleefanka 1-800-692-7380. Haddii aad u baahan tahay caawimaad xagga sharciga ah, la tasho qareen gaar ah ama wac xafiiska Xafiiskaaga Gargaarka Sharciga.



Tallaabooyinka ay tahay in Looga Fogaado in Lagaa Joojiyo Adeeggaaga

Waa masuuliyadaada inaad si degdeg ah ula xiriirto shirkada adeegga wixii ku saabsan muranka biilka ama dhibaatada bixinta si looga fogaado gooynta adeeggyadaada.

1. La xiriir shirkadda adeegga taleefanka lambarka ku qoran ogeysiiska. Weydiiso inaad sameysato heshiis lacag bixin. Muddada heshiisyada lacag bixinta waxaa go'aaminaya sharciga. Haddii qoyskaaga dakhligoodu hooseeyo, hubi inaad u sheegto shirkadda adeegga maadaama ay jiraan heshiisyo lacag bixin oo waqti dheer ah oo loo heli karo qoysaska dakhligoodu hooseeyo. Shirkadda utility waxaa kaliya looga baahan yahay inay kugu siiso hal heshiis lacag bixin wixii isla deyntaas ah. Haddii aadan aamminsanayn in adeegga ay bixinayso muddada lacag bixin waxaad uga sheegi kartaa Public Utility Commission (Guddiga Adeegga Dadweynaha) (PUC) taleefanka ah 1-800-692-7380. PUC waxay soo saari kartaa heshiis lacag bixin.

2. Tus inaad bixisay biilkaaga ama muuji inuu jiro khilaaf (muran) ku saabsan biilkaaga. Haddii aad ku muransan tahay biilkaaga ama aadan ku raacsaneyn akhrinta mitirka, waa inaad ogeysiisaa shirkadda adeegga oo aad u sheegtaa inaad ku muransan tahay biilka. Adeeggaagu lama awoodi doono in la xidho muddada aad sugayso jawaabta su'aalahaaga ama murankaaga. Waxaa wali lagaa rabaa waajibaadka inaad bixiso dhamaan biilasha adeegga ee aadan ku murmin, oo ay kujirto biilasha aad heleyso inta cabashadu socoto. Haddii adiga iyo shirkaddaada adeegga aad ku heshiin weydaan, ka wac Public Utility Commission (Guddiga Adeegga Dadweynaha) (PUC) taleefanka 1-800-692-7380.

3. Shirkadda adeegyada ma gooyn karto adeeggaaga haddii aad hesho caddeyn caafimaad oo ah in qof gurigaaga ka mid ah uu si xun u jiran yahay ama uu qof qabo xaalad caafimaad oo ka sii dari doonta haddii la gooyo. Ka dib markaad shirkada adeegga u sheegto xaaladdan caafimaad, waxaad u baahan doontaa inaad hesho dhakhtar ama xirfadle kalkaaliye caafimaad oo soo waca ama u soo diro bayaan shirkada adeegyada xaqiijinaya xaalada caafimaadka. Gooynta adeegyada waxaa la joojin karaa ugu badnaan 30 maalmood markiiba. Caddaynta caafimaadku waxaa la cusbooneysiin karaa laba jeer oo dheeraad ah. Haddii adeeggaaga mar hore la xiray, tani waxay u baahan doontaa shirkadda adeegga inay soo celiyaan adeeggaaga. Waa inaad wali sameysaa diyaarin lacag bixin ah wixii ah biilasha adeeggyada ee aan muranka ka jirin.

4. Haddii aad tahay dhibane rabshad guri oo aad leedahay Ilaalin ansax ah oo ka socota Amarka Xadgudubka (PFA), waxaa jira nidaamyo iyo ilaalinno gaar ah oo lagula tacaalayo adeeggaaga. Kac shirkadda adeegga si aad ugu wargaliso PFA-gaaga sidaa darteed habraacyadan khaaska ah iyo ilaalintooda ayaa adiga lagugu meelayn karaa. Waxaa lagaaga baahan karaa inaad siiso nuqul ka mid ah PFA shirkadda adeegga.

5. Haddii aad ku nooshahay guri dakhliisa hooseeya, waxaa laga yaabaa inay jiraan qaban-qaabooyin gaar ah oo lagugu caawinayo
   – Eeg *Mushkiladda Bixinta Biilasha Adeegga* macluumaadka wixii ku saabsan barnaamijyada caawiya macaamiisha dakhligoodu hooseeyo.

Maxaa Dhacaya Haddii Milkiilaha Gurigaygu Mas'uul ka yahay Bixinta Biilasha Adeegga?

Haddii mulkiilahaagu mas'uul ka yahay bixinta kharaashaadka adeegga oo uu ku fashilmo unuu bixiyo biilka adeegga ama haddii mulkiiluhu uu ku amro shirkadda adeegga inay gooyso adeeggaaga, Sharciga Xuquuqda Adeegyada Kireystayaasha wuxuu u baahan yahay inay ku ogeysiiyaan shirkadda adeegyada ugu yaraan 30 maalmood ka horay intaan la gooynin.

Mar alla markii adeegyada gooyo, xaaladdu way sii adkaan kartaa. Marka hore, iskuday inuu milkiiluhu sameyso lacag bixinta lagama maarmaanka ah isla markaaba si loo soo celiyo adeeggaaga. Haddii mulkiilaha uusan sameynin lacag bixinta lagama maarmaanka u ah soo celinta adeegga, adiga iyo kiraystayaasha kaleba waxaa laga yaabaa inay tahay inaad sameyso lacag bixinta si adeegga dib loogusoo celiyo. Biil kasta oo aad bixiso si adeegga dib loogu soo celiyo waxaa laga jari karaa lacagahaaga kirada ah. Sidoo kale waad awoodi kartaa in adeegga yutiilitiga in loo wareejiyo magacaaga. Si kastaba ha noqotee, aad uga taxaddar—waxaad u baahan kartaa inaad dhigato carbuun la taaban karo oo sidoo kale waxay saameyn ku yeelan kartaa heshiiskaaga. Raadso qareen sida ugu dhaqsaha badan haddii aad tan sameyso.

Dib U helida Adeegga Yutuulitiga

Inta u dhexeysa Abriil 1 iyo Noofambar 30, haddii aad bixiso lacagta lagu leeyahay oo dhan ama aad sameyso heshiis lacag bixin (haddii aad xaq u leedahay) oo aad buuxiso shuruudaha kale ee ay u baahan tahay shirkadda adeegga, adeeggaaga waa in lagu soo celiyo 3 maalmood gudahood.

Inta u dhexeysa Disembar 1 iyo Maarso 31, adeeggaaga waa in lagu soo celiyo 24 saacadood gudahood haddii aad bixiso lacagta lagu leeyahay oo dhan ama aad samayso heshiis lacag bixin (haddii aad xaq u leedahay) oo aad buuxiso shuruudaha kale ee ay u baahan tahay shirkadda adeegga.

Yaa Ka Masuul Ah Bixinta Biilasha Adeegga?

Haddii heshiis ijaareed qoran yahay ama mid afka ah, labada dhinacba waa inay ku heshiiyaan dhinaca mas'uul ka ah bixinta biilasha adeegga. Kiraystuhu wuxuu mas'uul ka noqon karaa korantada iyo gaaska inta mulkiiluhu mas'uul ka yahay biyaha iyo bullaacadaha. Haddii heshiis ijaareedkaagu qoraal yahay, hubi in heshiis ijaareedku qeexayo cidda mas'uulka ka ah bixinta adeegyada.

Ma Loo Baahan Yahay Inay Mitir Shaqsi ahaan oo U Gaar Ah uu Leeyahay Abaarta Kasta?

Haddii kiraystuhu mas'uul ka yahay bixinta biilasha adeegga, Pennsylvania Utility Code (Xeerka Adeegyada Pennsylvania) wuxuu uga baahan yahay mulkiilaha inuu hubiyo in guri kasta leeyahay mitir shaqsi ahaaneed. Tan micnaheedu waxaa weeye ma jiri karto "rar shisheeye" oo ku qoran biilka adeegyada kiraystaha — fiilo-koronta galinta guriga kiraystaha lagu dari karo meelaha la wadaago ama abaarta kale ah. Haddii dhisme ka kooban yahay saddex qaybood, markaa waa inuu jiraa saddex mitir oo gooni u ah guri kasta iyo mitir u gooni ah aagagga la wadaago.

Haddii unug kiro ah shaqsi ahaan aan loo xisaabin, ka dib mulkiilaha guryuhu wuxuu mas'uul ka yahay biilka adeegga — oo ay ku jiraan wixii haraa ah ee la soo dhaafay oo ay tahay in la bixiyo. Shirkadda adeegga waa inaysan u oggolaan kiraystaha in loogu dallaco adeegga illaa laga xaqiijiyo in fiilo-koronto galinta la saxay.

Milkiilaha Gurigayga Ma iga Aargoosan Karaa Sheegashada Xuquuqdayda Ku sabaasan Adeegyada?

Waxaa jira qodob ka mid ah Pennsylvania Utility Code (Xeerka Adeegga ee Pennsylvania) kaas oo ka dhigaya sharci darro mulkiilaha inuu ka aarguddo kiraystaha ayagoo adeegsanaya xuquuqdooda sida ku xusan Pennsylvania Utility Code (Xeerka Adeegga Pennsylvania). Mulkiile kasta, wakiil ama shaqaale kireyste oo u hanjabo ama aargoosi kusameeyaa kiraystaha wuxuu mas'uul ka noqon karaa magdhaw la mid ah kiro laba bilood ama khasaaraha dhabta ah ee uu kiraystuhu haysto, hadba kii weyn, iyo kharashaadka kirada iyo khidmadaha qareenka ee macquulka ah.

Waxaa jira qodobka ka-hortagga aargudashada ee sharciga oo dhigaya aargudasho sharci darro ah haddii milkiiluhu doonayo inuu kireysto ama ka saaro kirayste 6 bilood gudahood markii kiraystuhu ku dhaqmayo xuquuqdooda sida ku xusan Pennsylvania Utility Code (Xeerka Adeegga ee Pennsylvania) marka laga reebo kiisaska aan kirada la bixinin. Xusuusnow in xuquuqahan aan laga qaadi karin xitaa haddii heshiisku sheegayo inaad ka baxday xuquuqdan.

Milkiilaha gurigayga Ma Joojin Karaa Adeegyadeyda Maadaama Aan La daahay Kirada?

Mulkiilahaaga sharci ahaan looma oggola inuu farageliyo adeeggaaga yutiilitiga, xitaa haddii aad la daahday kiradaada. Xitaa marka biyaha, bullaacadaha, gaaska, ama korontada lagu daro lacagta kiradaada billaha ah, mulkiiluhu sharci ahaan kaama gooyn karo adeeggaaga yutiilitiga. Tan waxaa loo tixgelin karaa inay tahay isku day sharci darro ah oo guriga lagaaga saarayo iyada oo aan la marin hanaan sharciyeed oo munaasib ah, haddii taasi dhacdo ama haddii mulkiiluhu u hanjabaado tan, waa inaad la tashataa qareen ama aad wacdaa gargaarka sharciga. Eeg *Su'aalaha iyo Jawaabaha Guuritaanka: Milkiilahayga Ayaa Igu Hanjabay Inuu I Xirayo.*

Mushkiladda Bixinta Biilasha Adeegga

Haddii aadan bixin, ama haddii aad la daahsan tahay bixinta, biilashaada adeegga, shirkadda adeegga ayaa gooyn karo adeegga gurigaaga kirada ka dib markii lagu siiyo ogeysiis sax ah. Eeg *Gooynta Adeegyadda.* Si kastaba ha noqotee, xitaa haddii aadan bixin karin lacagta oo dhan ee lagugu leeyahay, waxaad qaadi kartaa talaabooyin aad kusii wadan kartid adeeggaaga yutiilitiga.

- Korontada, gaaska iyo shirkadaha biyaha qaarkood waxay leeyihiin **Barnaamijyada Kaalmada Macaamiisha (CAPs)**. CAP-yada waxaa heli kara macaamiisha dakhligoodu hooseeyo ee ay ku adag tahay bixinta biilkooda buuxa ee bilaha ah. Barnaamijyadan waxay bixiyaan qiimo dhimis bille ah iyo sidoo kale cafiska deyntii hore iyadoo lagu beddelayo macaamiisha oo si joogto ah u bixisa lacagaha billaha ah. Weydii shirkaddaada haddii aad xaq u leedahay.
- Shirkadaha adeegyada waa inay kuu oggolaadaan inaad ku bixiso biilashaada **qorshe miisaaniyadeed** si lacagahaaga xilliga qaboobaha aysan aad u sarreeynin halka lacagahaaga xagaaga ay hooseeyaan. Sida ku xusan qorshaha miisaaniyaddu, lacagahaaga ayaa la isku celceliyaa si lacag bixinta bil kasta ay isku mid u ahaato.

- Waxaad xaq u yeelan kartaa **Low Income Home Energy Assistance Program (Barnaamijka Caawinta Tamarta ee Qoysaska Dakhliga Hooseeya) (LIHEAP)**. Barnaamijkan ayaa kaa caawin kara bixinta biilashaada adeegyada ama kharashyada kale ee kululaynta (kululeeyeyaasha hawada iyo hagaajinta guriga). Waaxda Badbaadada Dadweynaha waxay ka shaqeysaa seddex barnaamij oo tamar ah - Energy Assistance Cash Grant, the Crisis Grant, iyo the Crisis Grant Weatherization Repair Assistance. Haddii aad la kulanto mashaakil kuleyl, waxaa suuragal ah inaad uqalanto barnaamijyada mashaakilka barnaamijka LIHEAP. Xaaladaha degdegga ah waxaa ka mid ah qalabka kuleylka ee jaban ama khadadka daadinaya oo ay tahay in la hagaajiyo ama la beddelo, shidaal la'aan, isha kuleyliyaha ugu weyn ama isha kuleyliyaha labaad (isha loo isticmaalo in lagu shaqeeyo isha kuleylka ama la isticmaalo haddii isha kuleylka ugu weyn uusan shaqeynaynin) in gabi ahaanba la gooyay, iyo qatarta ay leedahay shidaal la'aanta (in ka yar 15-maalmood oo la soo bandhigo) ama la joojinayo adeegga yutiilitiga (helay ogeysiis in adeega la xiri doono 60ka maalmood ee soo socda).
- Shirkad kasta oo koronto iyo gaas ah waxay leedahay **Hardship Fund (Sanduuq Dhibaato)** oo ay macaamiisha dakhligoodu hooseeyo ay codsan karaan si looga fogaado in laga gooyo ama dib loogusoo celiyo adeeggii. Wac shirkaddaada si aad u ogaato inaad u qalanto.
- **Weatherization Assistance Program** iyo **Residential Low Income Usage Reduction Program** waa adeegyo lacag la'aan ah oo la siiyaa macaamiillo dhaqaalahoodu hooseeyo oo u qalma. Adeegyada la bixiyo waxaa ka mid noqon kara sahanka tamarta guriga, isticmaalka yareynta waxbarashada iyo adeegyada ka ilaalinta hawada. La xiriir shirkadda adeeggaaga ama Community Action Program (Barnaamijka Waxqabadka Bulshada) ee u adeega deegaankaaga si aad u dalbato ama aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

- Pennsylvania Public Utility Commission (Guddiga Adeegga Dadweynaha ee Pennsylvania) waxay leeyihiin agabyo badan oo gacan ka geysaneysa inay shakhsiyaadka iyo qoysasku siiyaan diirimaad inta lagu guda jiro jiilaalada Pennsylvania. Booqo websaydhkooda www.puc.state.pa.us si aad wax dheeraad ah uga barato.
- Haddii aad ku nooshahay **meel ka baxsan magaalada Philadelphia**, ka booqo $1 Energy Fund ($1 Sanduuqa Tamarta) www.dollarenergy.org ama la xiriir shirkaddaada adeegga wixii macluumaad ah ee kaa caawin kara inaad bixiso biilkaaga tamarta.
- Haddii aad ku nooshahay **magaalada Philadelphia gudaheda**, ka booqo Utility Emergency Services Fund (UESF) (Sanduuqa Adeegyada Gargaarka Degdegga ah) www.uesfacts.org ama wac (215) 972-5170 si aad u hesho macluumaad ku saabsan barnaamij kaa caawin kara inaad bixiso biilkaaga adeegga.

Si aad u dalbato ama aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan **LIHEAP,** ka wac Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee PA taleefanka ah 1-800-692-7462 Isniinta ilaa Jimcaha (shaqsiyaadka qaba dhaga beelka waxay wici karaan 711). Waxaad ka dalban kartaa LIHEAP www.compass.state.pa.us. Haddii aad u baahan tahay caawimaad dhanka buuxinta dalabkaaga COMPASS, ka wac KHADKA CAAWIMAADA 1-800-692-7462 inta u dhaxaysa 8:30 a.m. iyo 4:45 p.m., Isniinta ilaa Jimcaha. Haddii aad dhaga beel qabtid, ka wac TTY/ TTD taleefoonka ah 1-800-451-5886.

Waxaad sidoo kale wici kartaa Golaha Gargaarka ee Degmadaada ama Barnaamijka Waxqabadka Bulshada ee u adeegaya aaggaaga.

LA DAAHIDA KIRADA

Kireyste ahaan, waxaad sharci ahaan mas'uul katahay inaad bixiso lacagta kirada oo dhan waqtiga loogu talagalay iyadoo la raacayo heshiiskaaga kiraysiga. Haddii aadan kharashkaaga kirada waqtigeeda ku bixin, mulkiiluhu wuxuu kaa gudbin karaa tallaabo ah guri ka saarida. Macno malahan hadii aad naafo tahay ama aad shaqadaada lumisay, xubin qoyska katirsan uu jiran, ama aad caruur leedahay, ama hadii ay tahay bilaha jiilaalka—wali waa lagaa saari karaa guriga. Haddii aad aamminsan tahay inaadan awoodin inaad kiradaada si buuxda waqtigeeda ugu bixisid, waa inaad mulkiilahaaga **u sheegtaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.** Ha sugin illaa la gaaro xiliga layska rabo kharashka ijaarka ama ka dib taariikhdii la rabay inaad bixiso kharashka. Milkiilaha gurigaagu wuxuu u qaadan doonaa sida ugu xun haddii uusan kaa helin jeegaga kirada. Sharax sababta aadan u bixin karin oo codso in aad u sameysid nidaam lacag-bixin. Haddii mulkiilahaagu ogolaado heshiiska lacag bixinta, ku hel qoraal oo nuqul ka hayso. Haddii aadan u hoggaansamin heshiiska, mulkiiluhu wuxuu awoodaa inuu kaa saaro guriga.

Haddii aad dhibaato ku qabtid bixinta biilasha, muhiimadaada ugu horeysaa **waa inaad heshaa hoy.** Kiradaadu waa inay noqotaa mid ka mid ah mudnaantaada ugu sarreysa. Waxaad ka heli kartaa caawimaad wakaalad maxalli ah wixii ah bixinta kirada degdega ah. Caawinaad ayaa la heli karaa oo keliya inta lagu jiro bilaha qaarkood ee sanadka iyo sida caadiga ah waa hal mar sanadkii. Ururada diinta iyo kuwa bulshada ayaa waliba bixin kara caawimaad lacageed oo degdeg ah. Xafiiska kaalmada ee degmadaada ayaa laga yaabaa inuu helo gargaar hoy oo degdeg ah dadka u baahan caawinta bixinta kiradooda ama bixinta carbuunta amniga ee meel cusub oo lagu noolaado. Waxaad sidoo kale tixgelin kartaa inaad dalbato guri kabitaan ah adoo u maraya Maamulka Guryeynta ee deegaankaaga.

Adeegaaga hakuu socdo. Haddii aad ku dhacday lacagta adeegyada oo aad la daahday, waxaad awood u yeelan kartaa inaad lagasho diyaarin qorshe lacag-bixin shirkaddaada adeegga. Tani waxay kuu oggolaaneysaa inay kuu sii shaqaynayaan laydhkaaga iyo kuleylkaaga intaad xallinayso arrimahaaga dhaqaale. Heshiisyo badan ayaa u baahan in kiraystuhu uu ku ilaaliyo adeegyada guriga muddada heshiiska kirada. Haddii aad u oggolaato adeeggaaga yutiilitiga in la joojiyo, waxaad la kulmi kartaa tallaabo guriga looga saarayo wixii khuseeyo jabinta kalmadaha heshiiska kirada. Waxaa jira barnaamijyo badan oo lagu caawinayo dadka dakhligoodu yar yahay ama aan u haysanin dakhli kuleylkooda iyo biilasha kale ee adeegga. Eeg *Mushkiladda Bixinta Biilasha Adeegga.*

Mulkiilahaaga sharci ahaan looma oggola inuu farageliyo adeeggaaga yutiilitiga, xiitaa haddii aad la daahsan tahay bixinta kiradaada. Xitaa marka biyaha, bullaacadaha, gaaska ama korontada lagu daro lacagta kiradaada billaha ah, mulkiiluhu sharci ahaan kaama joojin karo adeeggaaga yutiilitiga. Tan waxaa loo tixgelin karaa inay tahay isku day sharci darro ah oo guriga lagaaga saarayo iyada oo aan la marin hanaan sharciyeed oo munaasib ah, haddii taasi dhacdo ama haddii mulkiiluhu u hanjabaado tan, waa inaad la tashataa qareen ama aad wacdaa gargaarka sharciga. Eeg *Su'aalaha iyo Jawaabaha Guuritaanka: Milkiilahayga Ayaa Igu Hanjabay Inuu I Xirayo.*

SI AAD U ARAKTO INAAD XAQ U LEEDAHAY KAALMOOYINKA GUUD sida **LIHEAP** (Gargaarka Tamarta), **Foojarka Cuntada, Gargaar Caafimaad, CHIP, Gargaarka Lacageed, Barnaamijka Shaqada Daryeelka Ilmaha, Cunnooyinka Dugsiga, Adeegyada Muddada Dheer,** iyo **Wax kaqabadka Hore, Naafonimada Dhimirka** ama **Adeegtada Ootisimka,** booqo www.compass.state.pa.us

Haddii aad u baahan tahay caawimaad dhanka buuxinta dalabkaaga COMPASS, ka wac KHADKA CAAWIMAADA 1-800-692-7462 inta u dhaxaysa 8:30 a.m. iyo 4:45 p.m., Isniinta ilaa Jimcaha. Haddii aad dhaga beel qabtid, ka wac TTY/TTD taleefoonka ah 1-800-451-5886. Haddii aad su'aal qabtid inta lagu jiro saacadaha aan shaqada ahayn ama aad doorbideyso inaad adeegsato boosto, waxaad kala xiriiri kartaa imayl ahaan adigoo u marayo websaydhkooda.

GURI KA SAARIDDA

Guri ka saarid waa talaabo sharci oo uu bilaabay milkiilaha guriga si uu ugu qasbo kiraystaha inuu ka guuro guriga. Maxkamad amartay in guriga laga saaro waa habka kaliya ee sharciga ah ee milkiilaha uu ku khasbi karo kiraystaha inuu ka baxo guri kiro ah. Guri ka saarida sharciga ah waxay u baahantahay dacwad maxkamadeed. Muddada howshu way kala duwanaan doontaa iyadoo kuxiran duruufaha guriga laga saarayo.

Mulkiilaha guriga wuxuu keeni karaa ficil guriga looga saarayo kiraystaha haddii:

- Kiraystuhu bixin waayo kirada,
- Kiraystuhu ku guuldaraysto inuu ka guuro guriga dhamaadka heshiiska kiradu, ama
- Kiraystuhu ku xadgudbo kalmadaha heshiiska kirada. Tusaalooyinka ku xadgudubka heshiiska kirada waxaa ka mid ah:
- La daahida kirada si joogto ah
- Waxyeelaynta qaybta ijaarka wixii ka baxsan fuqfuqa iyo dildilaaca caadiga ah
- U adeegsiga qaybta ijaarka ujeedooyin aan la oggolaanin sida ku cad heshiiska kirada (tusaale ahaan, ka furashada meherad, u oggolaanshaha dadka aan ruqsadda haysan inay kula noolaadaan, iwm.)
- Ku haysashada eey, bisad, ama xayawaan kale oo aan aheyn xayawaanka adeega marka xayawaanada rabaayada aan la ogolaanayn heshiiska ijaarka
- Ku xadgudubka qaylada soo noqnoqota taasoo khalkhal gelisa kiraystayaasha kale
- Ku lug lahaanshaha falalka dambiyada
- Ku guuldareysiga inaad gaagaabiso iyo banaanka la hagaajiyo haddii aad taas ku oggolaatey heshiiska kirada
- Kaydinta aan habooneyn ama ku shubida qashin soo jiita cayayaanka, jiirka, iwm.
- Ka gaabinta inaad u hogaansanaato xeerarka iyo qawaaniinta ku jira heshiiska kirada, ama ku lifaaqan heshiiska kirada, ama lagu siiyay saxiixa heshiiska

Amarka Dacwada Guri Ka saarista

Ogeysiiska Guri Ka Bixida

Milkiillaha gurigu wuxuu u badan yahay inuu bilaabo siinta kiraystaha**"Ogaysiiska Guri ka Bixida"**. Ogeysiiskaan waxaa lagu dhejin karaa albaabka kireystaha ama mulkiiluhu wuxuu u gacan gelin karaa qof weyn oo ka tirsan guriga. **Looma** soo diri karo si joogto ah ama boosto la xaqiijiyay. Ogeysiis kasta oo lagu soo diro boostada oo keliya waa in loo tixgeliyaa inuu yahay wax aan jirin oo maxkamadda looga doodo.

Hubi kalmadaha heshiiska ijaarkaaga. Waqtiga milkiilaha looga baahan yahay inuu siiyo kirayste si uu uga baxo waa in lagu qoraa heshiiska. Haddii heshiisku sheegayo shan maalmood, kiraystuhu waa in la siiyaa shan maalmood. Heshiiska kiradu wuxuu lahaan karaa "Ka tanasulida Ogaysiiska" kaasoo odhanaya mulkiilaha gurigu kuma qasbana inuu siiyo kiraystaha ogeysiis hore.

Hubi *Jadwalka Guri ka saarida* si aad u aragto inta ogeysiis ee loo baahan yahay haddii aan lagu qeexin

heshiiskaaga kirada. Haddii aan lagu cayimin heshiiskaaga, tirada ogeysiiska loo baahan yahay waxay kuxirantahay sababta guriga lagaaga saarayo.

Ogeysiiska Guri Ka Bixida waa inuu kujiro magaca mulkiilaha, magaca kireystaha, cinwaanka guriga kirada, sababta ogeysiiska (sida inaad ku bixin weyday kiro waqti cayiman ama xad gudub kale oo ah heshiiska kirada) iyo taariikhda uu mulkiiluhu doonayo inuu kiraystuhu ka guuro guriga kirada. Ogeysiiska waa inuu ahaadaa mid cad, go'aansan, kana madaxbanaan madmadowga.

Maxaa dhacaya haddii mulkiiluhu uusan siin ogeysiis sax ah?
Haddii milkiiluhu uusan bixin ogaysiis munaasib ah sida ku xusan heshiiska kirada, kiraystuhu wuxuu geyni karaa tan maxkamadda. Haddii kiraystuhu uu muujin karo in aan ogaysiiska saxda ah la siinin (tusaale ahaan, mulkiiluhu wuxuu bixiyay 10 maalmood ogeysiis ah markii uu heshiisku u baahan yahay ogeysiis 30 maalmood ah), ka dib garsooruhu waa inuu diidaa kiiska oo uu ka codsadaa mulkiilaha inuu dib usoo bilaabo nidaamka isagoo siinaya Kiraystaha ogeysiiska saxda ah ka hor inta uusan mar kale soo dacawayn. Kani waxay siini doontaa kiraystaha waqti dheeri ah oo uu sii joogo guriga, kama hor istaageyso kiraystaha in ugu dambeyn guriga laga saaro.

Dhageysiga Maxkamada

Haddii kiraystuhu guuray waqtigii lagu sheegay ogaysiiska guri ka saarista, mulkiiluhu waa inuu aadaa Maxkamadda hoose ee Degmooyinka si uu u fayl garaysto **cabashada Mulkiilaha/Kiraystaha.** Dhageysiga maxkamadda waxaa loo cayimin doonaa toddobo (7) illaa shan iyo toban (15) maalmood kadib markii mulkiiluhu cabasho soo gudbiyo.

Waxaad ka heli doontaa nuqul ah Cabashada Mulkiilaha/Kiraystaha Maxkamadda hoose ee Dagmooyinka iyadoo laguusoo marinayo boostada dabaqada koowaad waxaad sidoo kale heli doontaa nuqul ay kuugu adeegtay amaan sugida ama askari. Haddii aad hesho ogeysiis ah dhageysi maxkamaddeed, la xiriir ururka xuquuqda kiraystaha ama qareenka si aad ugala hadasho duruufahaaga gaarka ah si aad u ogaato xuquuqdaada oo aad diyaar u ahaato.

Miyaan tagaa dhageysiga?
Haa! Haddii aad soo daahdo ama aad imaan weydo dhageysiga, xukun ayaa lagugu soo oogi karaa si caadi ah.
Qorsheyso inaad goor hore timaaddo sababta oo ah xitaa haddii aad daqiiqado yar uun ka daahsan tahay, xukun ayaa adiga si caadi ah lagugu soo oogi karaa. Joogistaadu waxay muhiim u tahay dhageysiga. Haddii qof kale oo aan ahayn maxkamadda uu kuu sheego in dhageysiga la baajiyay ama dib loo dhigay, la xiriir Maxkamadda si aad u go'aamiso haddii tani run tahay. Dhageysigu wuxuu ku siinayaa fursad inaad ku soo bandhigto difaacaaga ama dacwada aad ka gudbinayso dhanka kale. Haddii aadan tagi karin maalinta loo qabtay jadwalka dhagaysiga ama xaalad degdeg ahi timaado, wac xafiiska Maxkamadda hoose ee Degmooyinka sida ugu dhaqsaha badan ka hor taariikhda maxkamadda oo weydii haddii dhageysiga la sii wadi karo si ay kuugu saamaxdo inaad soo xaadirto.

Haddii adiga iyo milkiiluhu aad heshiis gashaan ka hor taariikhda maxkamadda ama haddii qof

aan ahayn maxkamadda ay kuu sheegto in "wax walba laga shaqeeyay", qorsheyso inaad ka soo qeybgashid dhageysiga si kastaba ha noqotee ama ka hubso maxkamadda si aad u ogaato haddii dhageysiga weli la qorsheeyay. Eeg *Su'aalo iyo Jawaabo: Maxakamadda hoose ee Degmooyinka* wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dhageysiga iyo waxa laga filan karo.

Waqti kasto dhegeysiga ka hor, waxaad xereyn kartaa cabasho isweydaarsi (ama "sheegasho") ama waxaad cadeyn kartaa dalab kale oo ka dhan ah milkiilaha. Haddii aad gudbiso cabasho is-waydaarsi ah, dhagaysiga labada cabasho waa in la qabtaa ka dib toddobo (7) maalmood, laakiin aan ka badnayn shan iyo toban (15) maalmood laga soo bilaabo xilligi xaraynta cabashadaada. Haddii aad gudbiso dacwad ka dhan dacwoodaha, waa in lagu diraa dhinaca kale ugu yaraan shan (5) maalmood ka hor dhagaysiga.

Go'aan Maxkamadeed

Dhageysiga ka dib, Garsooraha Maxkamada Hoose ee Degmooyinka ayaa go'aan gaari doona maalintaas ama seddex (3) maalmood gudahood. Garsooraha ayaa soo saari doona **Ogeysiis qoran oo xukun ah.** Haddii xukunku adiga lagugu taageero, milkiilaha waxaa laga rabaa inuu sameeyo wixii uu Garsooruhu ku amray - sida inuusan kaa saarin qeybta kirada. Haddii Garsooraha Maxkamada Hoose ee Degmadu uu u arko inuu doorbido milkiilaha, xukunka ayaa lagugu soo oogi doonaa. Ogaysiiska ayaa kuu sheegi doona nooca xukunka la sameeyay.

- Guri Ka Qaadis ayaa La Oggolaaday haddii Xukunka Lacagta aan Lagu Qancin
- Guri Ka Qaadis ayaa La Oggolaaday
- Guri Ka Qaadis Lama Oggolaanin
- Xukun Lacageed

Haddii Xukunka uu yahay in **Guri Ka Qaadis La Oggolaaday Haddii Xukunka Lacagta Aan Lagu Qancin** (caadi ahaan loo yaqaan "Bixi oo Joog"), waxaad fursad u leedahay inaad bixiso lacag kasta oo lagu leeyahay wakhti kasta ka hor taariikhda guri ka saarida si looga fogaado in lagaa saaro guriga oo aad sii joogtid guriga.

- Haddii mulkiilaha si buuxda loo siiyo lacagta, oo ay kujirto kharashaadka xukunka, 10 maalmood gudahood ee xukunka, wax amar ah oo guri ka qaadis ah lama codsan karo.
- Haddii aadan bixin 10 maalmood gudahood ama aad xereyso Rafcaan oo aad bixiso boon haddii loo baahdo, mulkiiluhu wuxuu codsan karaa Amarka Guri ka qaadista. Kharashka maxkamadda kor ayuu ukici haddii mulkiiluhu dalbado Amarka Guri Ka Qaadista, sidaa darteed waxaa ugufiican inaad sida ugu dhaqsaha badan u bixisid.
- Taariikhda guri ka saarida khasabka ah waxaa loo jadwaleeyn doonaa 10 maalmood kadib markii **Amarka Guri Ka Qaadista** uu kusoo dhejiyo askari albaabkaada. Ilaa iyo maalintaas, oo weli waad ku bixin kartaa xukunka buuxa si looga fogaado in guriga laga saaro.
- Haddii aad bixiso kahor taariikhda guriga lagaaga saarayo, waa inaad heshiis la sameysataa mulkiilaha iyo askariga oo aad haysataa risiidhka caddeynta lacag bixinta.

- Haddii aad bixiso maalinta lagaa saarayo guriga, waa inaad si toos ah ugu bixisaa sarkaal boolis ah oo waana inaad lacag caddaan ah bixisaa. Sarkaalka boolisku ma sameyn doono hubin guri ka saaridduna waxay usii socon doontaa sidii loo qorsheeyay.

Maskaxda ku hay: Xukunka ayaa ku jiraya diiwaankaaga ilaa aad si buuxda u bixisid. Waxay saameyn kartaa qiimeyntaada amaahda waxayna si xun u saameyn kartaa awoodaada aad ku heli karto guri mustaqbalka.

Amarka Guri Ka Qaadista

Haddii xukunku yahay **Guri ka qaadis,** waa inaad ka guurtaa guriga taariikhda guri ka saarista la qorsheeyay xitaa haddii aad bixisid lacagta oo dhan. Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka oo aad rabtid inaad guriga ku sii jirtid, waxaad u baahan doontaa inaad u fayl gareyso Rafcaan Court of Common Pleas 10 maalmood gudahooda taariikhda xukunka oo aadna dhigto boon. Eeg *Habka Rafcaanka*

Kadib 10-ka maalmood ee rafcaan qaadashada, mulkiiluhu wuxuu codsan karaa Amarka Guri ka qaadista. Markii milkiiluhu uu helo Amarka Guri Ka qaadsta, kiraystaha waxaa loosoo diri doonaa ogeysiis uu ugu keenayo sarkaalka boolista shaqsi ahaan ama albaabkaada lagusoo dhejin doono.

- Ogeysiiska sarkaalka booliiska ayaa sheegaya inuu kiraystuhu haysto toban (10) maalmood oo dheeri ah oo uu kaga baxo guriga laga bilaabo taariikhda adeegga.
- Ogeysiiskan waa waqtiga kama dambeysta ah ay tahay in guriga lagaga baxo.
- Hadii kiraystuhu uusan ka guurin dhamaadka tobanka (10) maalmood waqtiga iyo taariiqda ku qoran ogeysiiska, sarkaalka booliska ayaa guriga si qasab ah uga saari karaa kiraystaha oo albaabka guriga kirada ahna ku dhufan karaa quful.

Haddii aadan qorshaynayn inaad Rafcaan qaadatid, waxaad u baahan doontaa inaad samayso qorshayaal aad uga baxdo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ka hor taariikhda guri ka saarida. Uguyaraan ka raro alaabadaada oo dhan gurigaaga kirada kahor inta aan lagaarin guri ka saarida la qorsheeyay maxaa yeelay waxaad heli doontaa kaliya daqiiqado aad guriga kaga baxdid markii sarkaalka boolisku imaado.

Kireystayaasha waxaa looga baahan yahay inay ka rartaan alaabtooda markii ay ka tanaasulaan haysashada guriga kirada (oo ay ku jiraan waqtiga guri ka saarista). Haddii aadan ka raranin alaabtaada markuu sarjaalka boolisku kaa saarayo, waa inaad dhaqsi u guurtaa si aad u soo ceshato hantidaada. Eeg *Sida Loo Soo Ceshto Waxyaabaha aad leedahay Ka Dib Markii Guri Lagaa Saaray Ama Aad ka Guurtay*

Maskaxda ku hay: Waxay qaadataa ugu yaraan labaatan (20) maalmood kadib dhegeysiga ka hor intaan guri ka saarida sharciga ahi dhicin.

Maxaa dhacaya haddii sarkaalka boolisku uusan weligiis u imanin inuu guriga iga saaro?
Waa suurta gal tahay in mulkiiluhu waligii kuga fulin doonin Amarka Guri ka qaadista oo sarkaalka boolisku aan waligiis lagu wargalin inuu guriga kaa saaro. Guud ahaan, tani waxay dhacdaa marka milkiilaha iyo kiraystuhu ay ka shaqeeyaan heshiiska lacag bixinta oo mulkiiluhu ogolaado inuu kiraystuhu joogi karo. Haddii aad karti u leedahay inaad heshiis ka shaqeysaan, hubi inaad heshid risiidhki aad lacagta kusiisay milkiilaha heshiiskana ha ahaado qoraal ahaan.

Mulkiiluhu wuxuu codsan karaa dib-u-soosaarista Amarka Guri ka qaadista guud ahaan120 maalmood gudahood ee taariikhda xukunka.

Habka Rafcaanka

Go'aanka Garsooraha waxaa badanaa jira labo qaybood: **Haysashada** (guri ka saaris) iyo **Xukun Lacageed.**

Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadato xukunka lagugu xukumay. Rafcaannada waxaa lagu xareystaa

Prothonotary(karraaniga maxkamadda) ee Court of Common Pleas. Si aad rafcaan uga qaadato go'aanka ay gaadhay Maxkmada hoose ee Degmooyinka, waxaad u baahan doontaa inaad nuqul xukun ah la timaadid xafiiska Prothonotary (karraaniga maxkamadda). Waxaa lagugula talinayaa inaad raadiso lataliyaha qareenka haddii aad dooratay inaad xereyso Rafcaan, maaddaama howsha heer maxkamadeed ay adagtahay. Waxay u badan tahay, mulkiiluhu inuu yeelan doono qareen.

Haddaad rafcaan ka qaadanayso Xukunka Guri ka qaadista oo aad rabto inaad gurigaaga sii joogto, waxaad haysataa toban (10) maalmood laga bilaabo taariikhda xukunka inaad rafcaan ka qaadato go'aanka.

Waa inaad sidoo kale xareysaa **Amarka joojinta go'aan maxkamadeedka** si aad u joojiso amaan sugaha ama sarkaalka askariga inuu kaa saaro guriga. Haddii aadan usheegin Xafiiska Prothonotary(karraaniga maxkamadda) inaad rabto inaad joojiso guri ka saarida oo aadan xereynin Amarka joojinta go'aan maxkamadeedka markaa waxaad kaliya rafcaan ka qaadan doontaa xukunka lacagta oo quri ka saarida ayaa wali u dhici doona sidii loo qorsheeyay.

Waxaad bixin doontaa ujrada xereynta iyo amarka joojinta go'aan maxkamadeedka waxay u baahan tahay kiraystuhu inuu ku bixiyo boonta qadarka xukunka lacagta ama kirada 3 bilood, hadba kii ka yar. (Haddii aad leedahay dakhli aad u hooseeya, waxaad kaliya bixin kartaa seddex meelood oo kiradaada ah meeel boon ahaan markaad xereynaysid rafcaankaaga.) Lacagtan waxaa lagu meelaynayaa akoonka kaydinta lacagta la bixinayo. Waxaa kale oo lagaa rabaa inaad kirada billaha ah siiso maxkamada 30 maalmood kasta laga bilaabo taariikhda rafcaanka. Haddii aad ku guuldareysato inaad tan sameyso, Amarka joojinta go'aan maxkamadeed waa la joojin karaa guri ka saarida waa lasii wadi karaa. Hubso inaad ilaaliso waqtiga kama dambaysta ah maadaama bilaha qaarkood ay leeyihiin wax ka badan 30 maalmood.

Haddii aadan rabin inaad rafcaan ka qaadato Xukunka Guri ka qaadista, laakiin kaliya aad rabto inaad rafcaan ka qaadato Xukunka Lacagta, waxaad haysataa soddon (30) maalmood laga bilaabo taariikhda xukunka si aad rafcaan uga qaadatid.

Rafcaannada waxaa lagu xareystaa Prothonotary(karraaniga maxkamadda) ee Court of Common Pleas. Waxaad u baahan doontaa inaad nuqul xukun ah aad la timaadid xafiiska Prothonotary(karraaniga maxkamadda). Boon looma baahna inaad racfaan ka qaadatid xukunka lacagta.

Maxaa Dhacaya haddii Uusan jirin Wax Rafcaan ah?

Haddii Maxkamadda hoose ee Degmooyinku ay siiso **Xukunka Guri ka qaadis ah,** markaa mulkiiluhu waa inuu sugaa 10 maalmood si uu uga codsado dukumiinti la yiraahdo Amarka Guri ka qaadista Maxakamadda hoose ee Degmooyinka. Sarkaalka boolista ama amaan sugida ayaa kuu adeegi doonaa Amarka Guri ka qaadista oo ku siinaya 10 maalmood oo dheeraad ah si aad uga baxdo dhismaha. Haddii aadan guurin 10 maalmood gudahood kadib markaad hesho Amarka Guri ka qaadista, sarkaalka booliska ah ama ku xigeenka amaan sugida ayaa kaa saari doona guriga.

Haddii Maxakamadda hoose ee Degmooyinku ay bixiso **Xukun Lacageed,** waxaad haysataa 30 maalmood inaad xukunka bixiso. Haddii aadan bixinin, qofka ku dacweeyay wuxuu markaa aadi karaa maxkamada hoose ee Degmooyinka wuxuuna weydiisan karaa in la siiyo dukumintiga loo yaqaan **Amarka Guri ka qaadista.** Sarkaal boolis ah ama amaan sugida wuxuu kuugu adeegaa Amarka Fulinta adiga ayagoo ku siinaya ogeysiis ama ku dhejinaya albaabkaaga. Waqtiga lagu jiro Amar Fulinta lagu siiyay, sarkaalka booliska ama kuxigeenka amni sugida wuxuu sameyn doonaa liistada hantida asaga ama ayada ay iibin doonto si ay u bixiso xukunka lagugusoo oogay. Liiskaan waxaa lagu magacaabaa **hanti la wareegid.**

Wac qareen ama Caawimaadda Sharciga isla markaaba si aad u hesho caawimaad dheeraad ah haddii hanti la wareegid lagaa saaro hantidaada. Haddii aadan waxba samaynin, hantidaada waxaa la iibin karaa dhowr toddobaad kadib markii hanti la wareegid lagu sameeyo iibka magdhaw ahaan ama amaan sugida, ilaa ay ka yaraato $300 ($600 haddii aad is guursateen iyo, adiga iyo lamaanahaaga, labadiinaba laydan dacweeyay). Waxaad u xereyn kartaa Rafcaan ama diidmada Hanti la wareegida (iibinta hanti).

Xukunka Mushahar Ka jarida

Sharciga Pennsylvania wuxuu ogolyahay mulkiilaha inuu soo aruuriyo xukunka waxyeellada ka badan xaddiga Carbuunta Amniga isagoo ka jaraya 10% mushaharka kiraystaha ilaa inta qaddarkaani uusan dhigeyn dakhliga deynta laga leeyahay ee ka hooseeya jiheynta saboolnimada.

Jadwalka Ogeysiiska Ka saarida

Jadwalka Guri Ka saarista ee Mulkiilaha/Kiraystaha/Jadwalka Hanaanka Aan lasoo Cusboonaysiin Karin ee Abaartada ama Guri:

Haddii Sababta Guri Ka saarista:	Mulkiilahu Waa inuu Siiyaa Kirayste:
Kiro Bixin La'aan	Ogaysiis 10 Maalmood ah
Falalka ku saabsan Daroogada Sharci darrada ah	Ogaysiis 10 Maalmood ah
Dhamaadka/Jebinta Guud ee Heshiiska Billaha ah ama Heshiis Ku-meel-Gaarnimada Muddo Aan Xaddidan	Ogaysiis 15 Maalmood ah
Dhamaadka/Jebinta Guud ee Heshiiska Sannad ama Wax Ka Yar	Ogaysiis 15 Maalmood ah
Dhamaadka/Jebinta Guud ee Heshiiska Ka Badan Hal Sano	Ogaysiis 30 Maalmood ah

Jadwalka Hannaanka Guri Ka saarista Mulkiilaha/Kiraystaha ee Booska Guryaha Guurguura Lagu Bakimo:

Haddii Sababta Guri Ka saarista:	Mulkiilahu Waa inuu Siiyaa Kirayste:
Jebinta Guud ee Heshiiska Kirada ee Inka Yar Hal sano ama Muddo Aan Xadidnayn	30 Maalmood
Jebinta Guud Ee Heshiiska Kirada In Ka Badan Hal Sano	3 bilood laga bilaabo taariikhda adeegga
Ka gaabinta bixinta Kirada inta u dhaxaysa: Abriil-Ogosto	15 Maalmood
Ka gaabinta bixinta Kirada inta u dhaxaysa: Sebtember-Maarso	30 Maalmood

Jadwalka Hannaanka Guri Ka saarista Mulkiilaha/Kiraystaha ee Dacwada Sharciga ah iyo Racfaan ka Qaadashada Common Pleas:

Garsooraha Maxkamada Hoose ayaa Jadwal U sameeyay Dhegeysiga	1-15 Maalmood Kadib Markay Tahay Cabashada Mulkiilaha
Garsooraha Maxkamada hoose wuxuu galin doonaa xukunka Dhamaadka Dhageysiga ama 3 Maalmood Gudahood	3 Maalmood
Amarka Guri Ka Qaadista Mulkiilaha	10 maalmood kadib ee Ku Xigta Maalinta Ku Wareejinta
Sarkaal boolis ah oo Fulinaya Amarka Guri Ka Qaadista Wuxuu Ka Saari Karaa Guriga Qofka Deggan Haddii Ay Ku Sii Jireen Dhismaha Si Ka Badan:	10 maalmood ka dib Adeegga Amarka Guri Ka Qaadista
Xukunku Wuxuu Saameeyaa Gudbinta Haysashada Hantida Deggenaanshaha, Rafcaan Ka Qaadashada:	10 maalmood kadib Maalinta Ku Wareejinta
Xukunka ayaa loogu talagalay Lacag, ama Guri Ka Qaadista Aan La dagnayn, Rafcaan ka Qaadashada:	30 maalmood kadib Maalinta Ku Wareejinta

SU'AALO IYO JAWAABO: GURI KA SAARISTA

Waxaan ubaahanahay waqti dheeri ah si aan u guuro. Xaalkeygu waa khaas.

Arrintaasi miyey macno leedahay?

Xaq uma lihid inaad codsatid waqti dheeri ah si aad u hesho meel cusub oo aad ku noolaato ama kala guurto alaabtaada. Mas'uuliyaduhu waa isku mid dhammaan kireystayaasha. Macno malahan hadii aad tahay muwaadin da 'weyn ama hadaad caruur leedahay, wali waxaad leedahay waajibaad sharciyeed oo ah inaad fuliso heshiiska ama qandaraaska milkiilahaaguna wuxuu xaq u leeyahay sharci inuu kaa saaro hadii aad jabisay qandaraaska. Haddii aadan bixin kiradaada, ka dib mulkiilaha gurigu wuxuu xaq u leeyahay inuu kaa saaro guriga. Macno malahan hadii aad la daahdid lacagta kirada maxaa sababa ay ka mid yihiin inaad xanuunsan tahay ama shaqadaadi lumisay ama sababta oo ah waxaad leedahay biilal kale oo aad bixinaysid. Waxaad isku dayi kartaa inaad kala xaajooto mulkiilahaaga wixii waqti dheeri ah. Haddii mulkiilahaagu ogolaado waqti dheeri ah, markaa weydii milkiilaha inuu saxiixo heshiis sheegaya inaad sii joogi karto.

Ma haysto meel aan aado. Maxaan sameeyaa?

Waxaad u baahan doontaa inaad raadsataan meel adiga iyo alaabadaadaba. Ha uga tegin alaabtaada guriga. Mulkiilahaaga looma baahna inuu kuu hayo, runtiina, wuxuu kugu dallaci karaa lacag kayd ah haddii aad ka tagtid hantidaada. Haddii aadan heli karin meel aad ku noolaatid, la xiriir qoyska ama saaxiibbada. Waxaad ubaahan kartaa inaad alaabtaada dhigato meel ku meelgaar ah ilaa aad ka hesho meel cusub oo aad ku noolaato. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa guryaha hoyga ama guryaha ku-meelgaarka ah.

Miyaan joojin karaa guri ka saarista?

Haddii dacwada ka saarida ay ahayd **kaliya** kiro bixin la'aan, waxaad joojin kartaa guri ka saarida waqti kasto ka hor inta aan lagaa saarin guriga adigoo bixinaya cadadka ay maxkamada hoose ee dagmooyinka ay kugu amartay, oo ay kujirto kharashaadka maxkamada. Tan waxaa lagu magacaabaa xuquuqda bixinta iyo joogista. Kharashyada maxkamadda ayaa kor ukacaya haddii mulkiiluhu dalbado **Amarka Guri ka qaadista,** marka waxaa ugu wanaagsan in la bixiyo sida ugu dhaqsaha badan. Waxaad sidoo kale isku dayi kartaa inaad heshiis la gasho milkiilaha si aad u bixiso lacagaha ku saabsan inta lagugu leeyahay. Haddii aad awoodid inaad heshiis la gasho, hubi inaad qoraal ku hesho sidaa darteed waxaad caddeyn u heli doontaa haddii mulkiiluhu isku dayo inuu kaa saaro.

Milkiilaha gurigeygu wuxuu iigu hanjabay inuu guriga iga bixinayo. Ma sameyn karaan taasi?

Mulkiilaha looma ogola inuu kaa saaro abaartadaada ama gurigaaga amar maxkamadeed la'aan. Tan waxaa lagu magacaabaa **Iska-saarida** aan sharciga ahayn. Xitaa haddii mulkiiluhu qiray in iska saarida kireystaha, qaab aan sharci ahayn ay tahay mid sharci darro. Mulkiiluhu waa **inuu** siiyaa kiraystaha **Ogeysiiska Guri Ka Bixida**sida ku qoran heshiiska oo uu maro nidaamka ku habboon ee guri ka saarida iyadoo la adeegsanaya Maxkamada hoose ee Degmooyinka. Kaliya sarkaalka booliska ama amaan sugida ayaa si sharci ah uga saari kara hantida kiraystaha oo ku xanibi kara kiraystaha amar ay ka haysato Maxkamada

Tusaalooyinka Iska-Saarida sharci darrada ah waxaa ka mid ah:

- Xidhitaanka ama beddelida qufullada
- Ka saarida hantidaada gaarka ah guriga
- Xidhitaanka ama beddelida qufullada
- Ka saarida hantidaada gaarka ah gurig

Xusuusnoow: Xeerarka qolalka la kireysto waa kala duwan yihiin. Qolalka la kiraysto waxaa loola dhaqmaa sida hoteellada. Haddii kiraystuhu kiraysto qol isla markaana aan kirada la bixin, mulkiiluhu wuu xidhi karaa albaabka. Wac hay'adda u dooda xuquuqda kireystayaasha ama Kaalmo Sharci si aad u ogaato haddii xaaladaada nololeed ay buuxiso qeexitaanka guriga qolqolka ah. Sababta oo ah mulkiiluhu wuxuu guriga ugu yeeraa "qolalka la kiraysto" ama "guri ijaar ah oo qolal badan" macnaheedu maahan inaadan adigu ku lahayn wax ilaalin ah sida ku xusan Sharciga Mulkiilaha Kireystaha ee Pennsylvania.

Waxa jira dhawr ikhtiyaar oo uu kiraystuhu raaci karo haddii mulkiiluhu ku hawlan yahay iska saarida sharci darada ah. Kala tasho qareen ku saabsan ikhtiyaaradaada.

1. Booliiska wac. Waxaad u baahan doontaa inaad muujiso inaad xaq u leedahay inaad degto dhismaha. Marka, haddii aad filaysid in taasi dhici karto, dhigo nuqul heshiiska kiradaada iyo biilasha hadda la isticmaalo ee meel ka baxsan gurigaaga - sida baabuurkaaga ama boorsadaada. Waaxaha booliiska qaar ayaa soo dhexgali doona milkiilaha si ay dib kuugu soo celiyaan abaartada qaar waaxyada booliiskuna way diidi doonaan inay ku lug yeeshaan. Noqo qof Ixtiraam leh oo is-deji.
2. Wac Caawimaadda Sharciga ama qareen gaar ah wixii caawimaad ah.
3. Codso in garsooraha maxkamadda Common Pleas uu soo saaro amar ka dhan ah milkiilaha. Xaaladdan oo kale, amarku wuxuu noqon karaa amar maxkamadeed oo amar ku siinaya milkiilaha inuu kuu oggolaado inaad dib ugu laabato gurigaaga, aad soo daayo adeegaaga, iyo/ama joojiyo faragalinta adeegsigaaga sharciga ah ee gurigaaga.
4. Raadi inaad ka soo qaadatid khasaaraha dhabta ah mulkiilaha. Khasaaraha dhabta ahi wuxuu noqon doonaa dhamaan khasaare aad cadeyn karto inay kusoo gaartay. Tusaale ahaan wuxuu noqon karaa qiimaha macquulka ah ee qolka hoteelka haddii lagu qasbo inaad guurto sababtuna waa mulkiilahaaga inuu kaa xiray gurigaaga.
5. Raadi magdab ciqaab haddii milkiilaha dhaqankiisu uu ahaa mid waxashnimo ah oo ay ka dhasheen dhibaato shucuureed oo daran iyo waxyeelo jir ahaaneed.

Sideen ku helayaa alaabtaydii markii la iga saaray ama aan ka guuro guriga?

Haddii aad dhowaan guurtay ama lagaa saaray guri kiro ah, dib ayaad u soo ceshan kartaa alaabadii aad ka soo tagtay wakhti xadidan.

Haddii lagaa saaro ama aad ka guurto guri kiro ah, waxaad haysataa **toban maalmood** oo aad kula xiriirto mulkiilahaaga oo aad u ogeysiiso milkiilahaaga inaad damacsan tahay inaad soo ceshato hantidaada shaqsiyadeed ee

kaa hartay. Waa inaad ogeysiisaa mulkiilahaaga ujeeddada aad ka leedahay dib u soo celinta wixii hanti shaqsi ah ee ka haray adiga oo wacaya milkiilahaaga iyo adoo u diraya milkiilahaaga warqad. Hayso nuqul waraaqda aad u dirto mulkiilahaaga. Haddii aadan la soo xiriirin milkiilaha 10-ka maalmood ee ugu horreeya ka dib markii guriga lagaa saaray ama aad ka heshay ogeysiis milkiilaha inaad ka tagtay hanti shaqsiyeed, mulkiiluhu wuxuu ka qaadi karaa dhammaan hantida shaqsiyadeed.

Ka dib markaad la xiriirto mulkiilahaaga oo sheegaya inaad rabto inaad hesho, waxaad haysataa **30 maalmood** laga bilaabo maalinta guriga lagaaga saaray ama taariikhda ogeysiiska shabadaysan ee mulkiilahaaga inaad ku soo ceshato hantidaada shaqsiyeed.

Haddii aad guurtay oo aad ka tagtay hanti shaqsiyeed, milkiiluhu waa inuu kuu soo diraa ogeysiis kuu sheegaya inaad ka tagtay hanti shaqsiyeed. Haddii aadan siin milkiilahaaga cinwaan fariimaha lagugu soo gudbiyo, ogeysiiska waxaa loo diri doonaa cinwaankaagii hore. Haddii guriga lagaa saaray, milkiilahaagu qasab **kuma aha** inuu kuu soo diro ogeysiis inaad kaga tagtay hanti shaqsiyadeed. Waa inaad kaligaa la xiriirtaa milkiilaha.

10 maalmood kadib laga bilaabo maalinta guriga lagaa saaray ama taariikhda ogaysiiska shabadaysan ee mulkiilaha guriga lagu siiyay si aad u soo ceshato hantidaada, mulkiiluhu wuxuu bilaabi karaa inuu kaa qaado lacag kaydinta alaabtaada.

SU'AALOIYO IYO JAWAABO: MAXKAMADA HOOSE EE DEGMOOYINKA

Waa maxay Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinka?

Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinku waa sarkaal gudaha laga soo doortay oo go'aan ka gaari kara dacwadaha yar-yar ee madaniga ah sida arrimaha kireeyaha iyo milkiilaha. Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinka waxaa loo yaqaanay "Majistrate" ama "Justice of Peace".

Ma u baahanahay qareen?

Maya. Qareenka looma baahna inta lagu jiro dhageysiga. Si kastaba ha noqotee, haddii aad jeceshahay inaad qareen goobjoog ka ahaado, waad qabsan kartaa mid waxaadna keeni kartaa dhegeysiga.

Miyaan tagaa dhageysiga Maxkamada hoose ee Degmooyinka?

Haa! Haddii aad soo daahdo ama aad imaan weydo dhageysiga, xukun ayaa lagugu soo oogi karaa si caadi ah. Micnaheedu, haddii aad ku guuldarreysato inaad timaadid, waxaad waayi kartaa dhegeysiga oo waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso xukunka lagugu soo oogay. Joogistaadu waxay muhiim u tahay dhageysiga, xitaa haddii qof aan ahayn maxkamadda ay dhahdo in dhageysiga la baajiyay. Intaas waxaa sii dheer, dhageysigu wuxuu ku siinayaa fursad inaad ku soo bandhigto difaacaaga ama cabasho isweydaarsiga dhanka kale. Haddii aadan tagi karin maalinta loo qabtay jadwalka dhageysiga ama ay dhacdo xaalad degdeg ah, wac xafiiska Maxkamadda hoose ee Degmooyinka oo weydii haddii dhageysiga dib loo dhigi karo.

Haddii aad haysatid sabab wanaagsan oo aad uga daahdid ama dhageysiga maxkamadda ka maqnaatid, waa inaad xareysaa codsi degdeg ah ka dib markaad ogaato xukunka kama-dambaysta ah, waana inaad heysataa sheegasho difaac oo macquul ah, oo sax ah.

Waa maxay "Defense" (Difaac)?

Difaaciddu waa sababtaada eedeymaha lagu soo eedeeyey aysan run u ahayn. Uma baahnid inaad fayl garaysato dukumiinti kasta si aad u awoodo inaad soo bandhigto difaacaaga. Difaaca guud waa in mulkiiluhu uusan siin kiraystaha ogeysiis sax ah oo ah inuu ka baxo guriga ijaarka si waafaqsan heshiiska kirada. Haddii aad leedahay heshiis qoraal ah, milkiilaha waxaa sharci ahaan looga baahan yahay inuu ku siiyo ogeysiis waafaqsan heshiiska. Sharciga ayaa qeexaya waqti intee la'eg ee milkiiluh ku siinayo haddii aadan haysan heshiis qoraal ah. Eeg *Jadwalka Ogeysiiska Ka saarida.* Difaaca kale ee guud waa in guriga uu lahaa cillad halis ah. Wax kastoo difaacaada ah, waxaad u baahan doontaa dukumiinti iyo/ama marqaatiyo si aad u caddeyso difaacaaga.

Waa maxay a Plaintiff (Dacwoode)?

Dacwad-ooguhu waa qofka keenaya dacwadda; iyo qofka dacwaynaya eedaysanaha. Eedaysanuhu waa qofka la dacwaynaayo.

Waa maxay "Counterclaim" (Ka daba-sheegashada)?

Ka daba-sheegashudu waa sheegashada in qaybta kale ay lacag kugu leedahay. Tusaale ahaan, haddii kirayste uu bixiyay hagaajinta (ka dib markuu ogaysiiyay kireeyaha) si uu degenaanshuhu uga dhigo mid la degnaan karo oo mulkiiluhu aanu magdhaw uga bixin kiraystaha kharashaadka, kiraystuhu wuxuu soo gudbin karaa dacwad ka daba-sheegasho ah. Waa in lagu fayl gareeyaa **Foomka Cabashada Madaniga** ee xafiiska Maxkamadda hoose ee Degmooyinka. Ma jiro wax lacag ah oo laga xareysanayo dacwada ka daba-sheegashada, laakiin qofka dacwada gudbinaya waa inuu ka bixiyaa qiimaha u adeegida dacwoodaha dhinaca kale. Haddii aad qorsheyneyso inaad fayl garaysato dacwad ka daba-sheegasho ah, waa inaad fayl garaysaa isla marka aad hesho ogeysiiska dhageysiga. Dacwada mulkiilaha iyo ka daba-sheegashadaada waxaa lagu go'aamin doonaa dhageysiga.

Sideen ugu diyaargaroobaa dhagaysigayga?

Haddii aad leedahay qareen, waa inaad dul martaa macluumaadka laguu soo bandhigi doono dhageysiga qareenkaaga. Haddii aadan qareen haysan, waa inaad sameysaa liis warbixineed oo ah qodobbada muhiimka ah iyo qeexitaanno taxane ah oo ah wixii dhacay. Noqo mid soo koobo oo kana hadla nuxurka. Diyaar u noqo inaad sharaxdid shay kasta oo cadayn ah. Ku celceli inaad u sheegto dhinaca kiiskaaga. Haddii aad sawirro qaadday, waxaad u baahan doontaa inaad keento dhagaysiga. Waa inaad awood u yeelato inaad sheegto cidda qaaday sawirrada iyo goorta sawirrada la qaaday. Sida ugu fiican u labbis oo waqti ku habboon dhageysiga.

Maxaa ku dhici doona xilliga dhageysiga?

Xilliga dhageysiga, dhammaan maragyada waxay lagu sameeyaa Dhaar. Dacwoodaha (qofka ku dacweeyay) ayaa loo oggol yahay inuu marag furo marka hore. Markhaatiyaasha ayaa waliba ka marag kacaya dacwoodaha. Marka uu

Dacwoodahu sameeyo markhaanti, waxaad fursad u heli doontaa inaad weydiiso su'aalaho dadka marag furay. Lagaagama baahna inaad weydiiso wax su'aalo ah. Waxaa sidoo kale lagu siin doonaa fursad aad ku soo bandhigto kiiskaaga iyo marqaatiyadaada. Dheh "Maamuuskaaga waxaan jeclaan lahaa inaan soo bandhigo difaac." ama "Maamuuskaaga, waxaan jeclaan lahaa inaan weydiiyo Mudane ama Marwo X su'aal." Adiga iyo makhraatiyadaada waxaad weydiin kartaan Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinka ama Dacwoodaha.

Xusuusnow inaad ilaaliso xasilloonidaada oo aad akhlaaq wanaagsan lahaato. Noqo mid soo koobo oo kana hadla nuxurka. Isku day inaadan carqaladeynin ama garsooraha ayaa ku joojin kara. Kala hadal su'aalahaaga oo dhan iyo faallooyinka garsooraha adoo isticmaalaya "Maamuuskaaga" sida nooc cinwaan rasmi ah. Haddii aad jeceshahay inaad weydiiso su'aal koox kale, marka hore weydii garsooraha inuu rukhsad aad ku weydiiso ku siiyo. Ha carqaladeyn xaakinka ama qeybta kale. Waxaad fursad u heli doontaa inaad ku hadasho oo aad u sharaxdo kiiskaaga.

Ma diidi karaa shay uu qof markhaati ah uu leeyahay?

Haa. Labada diidmo ee ugu caansan waa Hadal markhaati oo sax ah iyo Markhaati hadal been ah soo xigta.

Diidmada Xukunka: Kiraystaha ama mulkiiluhu wuu diidi karaa haddii macluumaadka la soo bandhigo aanu ku habboonayn xaaladda dhegeysiga loogu talagalay in lagu xalliyo. Tusaale: Mulkiiluhu wuxuu marag ka yahay in walaalkaa la qabtay 10 sano ka hor asaga oo ladilay. Si edeb leh u dhah laakiin si adag. "Maamuuskaaga, waan kasoo horjeedaa tan. Taasi ma qusayso."

Diidmada Hadalka kutiri-kuteenahooda ah: Waxaad sidoo kale diidi kartaa marag ka noqoshada hadalada ay sameeyeen dadka aan joogin dhageysiga. Tan waxaa loo yaqaan "kutiri-kuteenahoo" waana in aan la ogolaan. Tusaale: Markhaati ayaa marag ka ah in deris u sheegay in ay aragtay adigoo daaqadda jabinaya. Dheh, "Maamuuskaaga waan kasoo horjeedaa tan. Taasi waa kutiri-kuteeenahoo."

Ka taxaddar inaadan carqaladeyn Garsooraha Maxkamad hoose ee Degmooyinkahadii aadan diidmo sharci ah aadan ku samaynaynin marqaatiga la soo bandhigo.

Ma Soo Qaadi Karaa Dukumintiyo?

Haa, waad soo qaadan kartaa dukumentiyo gacan ka geysanaya cadeynta kiiskaaga. Dukumiinti kasta oo muhiim u ah kiiska waa in lagu soo bandhigaa dhageysiga. Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinku maku siin doono fursad aad guriga ku tagto oo aad kusoo hesho dukumiinti kasta oo aad ilowdo inaad keento dhageysiga. Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmadu ma tixgelin doono qoraallada ka yimaada dadka aan u imaan dhagaysiga inay ku marag furaan haddii qaybta kale ay diido bayaanka qoraalka ah. Haddii qof qabo wax muhiim ah oo uu rabo inuu ka dhaho kiiskaaga, isaga/iyadu waxay u baahan doonaan inay ka soo qeyb galaan dhageysiga.

Si kastaba ha noqotee, Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinka wuxuu tixgelin karaa biil, qiyaasid, rasiidh, jeegaga la baajiyay ama caddeyn bangi haddii ay kaa caawineyso caddeynta difaacaaga ama ka daba-sheegashadaada. Hubso inaad keentid heshiiskaaga iyo wixii xiriir ah oo adiga iyo milkiilahaaga ah. La imoow sawirro iyo marqaatiyaal.

Ma u yeeri karaa qof si uu ugasoo muuqdo dhageysiga?

Haa. Waxaad xaq u leedahay inaad u yeeratid markhaati maxkamadeed. Waxaad jeclaan kartaa inaad ku wareejiso xeerka sarkaalka fulinta ama kormeeraha guryaha ama qof hagaajiya si ay uga marag kacaan xaalada gurigaaga. Wicitaan-maxkamadeed waa dokumenti u baahan shaqsi inuu yimaado maxkamadda oo uu caddeeyo xitaa haddii uusan dooneynin inuu yimaado. Markhaatiga sidoo kale waxaa looga baahan karaa inuu keeno dukumiintiyo gaar ah oo loo baahan yahay si loo caddeeyo difaacaaga ama ka daba-sheegashadaada. Waa inaad heshaa oo aad u adeegtaa dadka loo yeeray sida ugu dhaqsaha badan si loo hubiyo in marqaatiyaashu ay u helaan waqti ku habboon dhageysiga maxkamadda.

Maxaa dhacaya dhageysiga kadib?

Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinka wuxuu go'aan ku gaari doonaa xilliga dhageysiga ama boosto kuugu soo diri doonaa saddex (3) maalmood gudahooda. Haddii xukunku yahay mid u wanaagsan kiraystaha, milkiiluku waxaa laga rabaa inuu sameeyo waxa Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinka uu amar ku bixinayo. Haddii xukunku yahay mid u wanaagsan milkiilaha, kiraystuhu waxaa laga rabaa inuu sameeyo waxa Garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinka uu amar ku bixinayo. Eeg *Guri ka saaristu: Xukunka*

Ka waran haddii aanan oggolaan Go'aanka Maxkamadda hoose ee Degmooyinka?

Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadato xukunka lagugu xukumay. Rafcaannada waxaa lagu xareystaa Prothonotary(karraaniga maxkamadda) ee Aqalka maxakamadda Gobolka. Eeg *Guri ka saarista: Habka Rafcaanka*

Maxaan Sameeyaa Haddii Guriga ama Abaartada Aan Kiraysanayo lala wareegay ama Lagu Iibiyey magdhaw ahaan?

Haddii mulkiilahaagu joojiyo bixinta deynta, howsha la wareegista ayaa laga yaabaa inay bilaabato. Haddii milkiilaha guriga ku guul darreysto inuu sameeyo qorshe lacag bixin ee deyn degmo oo lagu leeyahay guryaha, hantidaas waxaa lagu iibin karaa magdhaw ahaan si loogu oggolaado degmada inay aruuriso deyntaas aan la bixin. Deymahaan waxaa ka mid noqon kara biilasha biyaha iyo bullaacadaha ee lagu leeyahay, canshuuraha dugsiga, iyo canshuuraha guryaha.

Markuu kiraystuhu ku nool yahay guri horay loola wareegay ama laga iibiyey magdhaw ahaan, mulkiilaha cusub (oo ay kujiro bangi) waa inuu u hogaansanaadaa qawaaniinta qaarkood. Mulkiilaha cusub ma beddali karo qufullada ama haddii kale tallaabo kama qaadi karo si uu ugu qasbo inay dadka degan ka baxaan guryaha. Kiraystaha waxaa laga saari karaa oo keliya amar maxkamadeed. Mulkiiluhu waa inuu tagaa maxkamadda oo uu fayl gareeyaa Tallaabada guri ka Saaridda. Tani gabi ahaanba wey ka duwantahay dacwadaha guryaha lala wareegay waxayna leedahay waxyaabo la mid ah laakiin way ka duwantahay howsha guri ka saarida milkiilaha-kireeyaha.

- Haddii ogeysiisyo macquul ah oo guri lala wareegay laguu keenay ama lagu dhajiyay gurigaaga, isla markiiba la xiriir soo diraha oo usharax inaad tahay kirayste. Waa inaad sidoo kale la xiriirtaa milkiilahaaga.
- Waxaad ka heli kartaa macluumaad jahwareer leh milkiilahaaga wixii ku saabsan guriga lala wareegay. Tusaale ahaan, mulkiiluhu wuxuu ku weydiisan karaa inaad dib ubixisid kiradaada taasoo ku xadgudbeysa heshiiskaaga ama heshiiskaaga kirada. Milkiilaha gurigaagu wuxuu kaloo kuu sheegi karaa in lala wareegida gurigu tahay "qalad,"

ama waxuu dhihi karaa in dhibaatadi la xaliyay. Yaan lagugu khiyaamayn inaad siiso kirada milkiilaha hore ka dib markii hantida horeba looga iibiyay dad kale. Si aad u hubiso, ka hubso xafiiska halka wax laga lahaanshaha lagu qorey ee ku yaal guriga uu ku yaallo. Waxaa kale oo laga yaabaa inaad rabto inaad fiiriso feylasha maxkamadda ee ku saabsan mulkiilahaaga.

- Wac Kaalmo Sharci ama la tasho qareen si aad u ogaato waxa ikhtiyaaraadkaagu yahay, inta ay le'egtahay lawareegida guriga ay qaadan karto iyo inta ay tahay waqtiga ay tahay inaad ka guurto ka dib markii guriga lala wareegay ama lagu iibiyay magdhaw ahaan.
- Haddii mulkiilahaagu bixin kari waayo deynta, mulkiiluhu sidoo kale laga yaabee in uusan bixinin yutiilitiga, adeegga yutiilitiga ayaa laga gooyn karaa. Waa inaad isla markiiba la xiriirtaa adeegga iyo milkiilaha haddii ogeysiiska gooynta lasoo diro ama haddii adeegyadaada la gooyo. Waxaad awoodi kartaa inaad ka fogaato gooynta adiga oo la xiriiraya shirkada adeegga oo aad si toos ah u bixiso, xitaa haddii adeegyadu ku qoran yihiin magaca milkiilaha. *Eeg Gooynta Adeegyadda*
- Yaan lagu khiyaamayn. Haddii qof kula soo xiriiro asagoo sheeganaya inuu yahay milkiilaha cusub, weydii inaad aragto dukumiintiyo muujinaya lahaanshaha. Tan samee ka hor intaadan kirada bixinin, aadan saxiixin heshiis kiro oo cusub, ama u oggolaan inay kugu imaadaan guriga. Dadka wax khiyaano waxay dib-u-eegaan diiwaannada guryaha lala wareega ee la heli karo oo ay la xiriiri karaan kiraystayaasha ku nool guryaha lala wareegay si been abuur ah u dalbadaan kiro.
- Kala hadal lacag bixinta si aad u guurto. Haddii milkiilaha cusub uu doonayo inaad ka guurto, weydii haddii isaga ama iyadu ay ku siin doonaan xoogaa lacag ah oo kaa caawiya bixinta kharashyada guurista. Tan waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa heshiiska "lacag lagu qaato furaha". Mararka qaarkood bangiga ama milkiilaha cusub ka dib iibinta la wareegida guryaha ayaa diyaar u ah inay sameeyaan tan haddii aad ogolaato inaad guurto muddo cayiman gudahood.
- Waa inaad ka saartaa dhammaan waxyaabahaaga markaad guurto si milkiiluhu cusub ee guryuhu u qaadanin ama u burburinin.
- Haddii milkiiluhu uusan soo celin carbuuntaada amniga ama uusan ku wareejinin milkiilaha cusub iibka guriga la wareegida kadib, waxaad u baahan kartaa inaad tallaabo sharci ah qaaddo si aad dib ugu hesho carbuuntaada. Eeg *Waxa la Sameeyo Haddii Mulkiilahaagu Uu Soo Celinin Carbuuntaada Amniga*

Wac Caawimaadda Sharciga ah ama kala tasho qareen xuquuqdaada.

AGABYO

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan arrimaha Sharciga oo ay ku jiraan **Milkiilaha/Kiraystaha,** Macaamilka, Caruurta iyo Qoysaska, Shaqada, Sharciga Caafimaadka, Guriyeynta iyo Hoyga, Faa'iidooyinka Guud, Naafada, Sharciga Dadka waaweyn, Arimaha Socdaalka, Arimaha Soogalootiga, iyo Khabiirada iyo Militariga booqo websaydhka PALawHELP.org.

Hadaad Rumeysan tahay Inaad La kulantay Midabtakoor Dhanka Guryaha ama aad Jeceshahay Inaad soo Sheegto Midabtakoorka Guryaha

U.S. Department of Housing and Urban Development (Waaxda Mareekanka ee Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka)

Si aad u xareysato cabasho takoor guri ku saleysan qolo, midab, diin, asal qaran, jinsi, naafo ama xaalad qoys:

- Ka wac HUDA 1-888-799-2085.
- Si aad u fayl garaysato cabasho onlayn ah: booqo www.hud.gov oo ku dhufo "File a Discrimination Complaint."
- Waxaad sidoo kale imayl ugusoo diri kartaa cabasho complaintsoffice03@hud.gov ama waxaad cabasho ugu diri kartaa boosto ciwaanka HUD FHEO, Attn: Intake Branch, 100 Penn Square East, Philadelphia, PA 19107.
- Lambarka TDD ee HUD waa 1-800-877-8339.

Cabashooyinka takoorida guryaha waa in lagu xareeyaa HUD 1 sano gudaheeda laga bilaabo taariikhda shilku dhacay.

Pennsylvania Human Relations Commission (Guddiga Xiriirka Aadanaha ee Pennsylvania)

Si aad u fayl garaysato cabasho ah midabtakoor guri oo ku saleysan qolo, midab, diin, asal qaran, jinsi, naafo, xaalad qoys, da' (wixii ka weyn 40), ama maxaa yeelay waxaad tahay sticmaalayaasha, maamulayaasha, ama tababarayaasha xayawaanka gargaarka ee loogu talagalay dadka naafada ah:

- Wac 215-560-2496 ama booqo www.phrc.pa.gov si aad usoo dejisato foomka cabashada.

Cabashooyinka waa in lagu xareyaa Human Relations Commission (Guddiga Xiriirka Aadanaha) ee PA 180 maalmood gudahood ee shilka.

Housing Equality Center (Xarunta Sinnaanta Guryaha)

Haddii aad ku nooshahay Magaalada Philadelphia ama Bucks, Chester, Delaware, Lehigh, Northampton, ama Montgomery, waxaad la xiriiri kartaa Housing Equality Center (Xarunta Sinnaanta Guryaha) si lagaaga caawiyo xereynta cabashada takoorka guryaha:

- Wac 267-419-8918 ama 866-540-FAIR (3247) ama imayl ugu dir info@equalhousing.org ama booqo www.equalhousing.org

Housing Equality & Equity Institute (Machadka Xaqsoorka & Guryaynta Si siman wax uqaybsiga) ee LHOP

Wixii ah la-tishi bilaash ah oo loogu talagalay milkiilaha guryaha ama Guryeynta Cadaalad ah ama caawimaadda farsamo oo ah dhanka xareynta cabashada ee gobollada Lancaster iyo York, ka wac LHOP Fair Housing Line 717-299-7840 ama booqo barta www.lhop.org.

Maxkamada hoose ee Dagmooyinka

Si aad u Hesho Maxakamadda hoose ee Degmooyinka ee Aaggaaga, tag bogga www.pacourt.us, guji 'Minor Courts' ka dibna guji 'Magisterial District Judge'. Waxaad ku raadin kartaa degmo ahaan ama koodh zip-ka si aad u hesho macluumaadka la xiriirka garsooraha Maxkamada hoose ee Degmooyinka ee ka shaqeeya aaggaaga.

Si Aad ula Xiriirto Sarkaalka Xeerka Fulinta ee Deegaankaaga

Degmo kastaa waxay leedahay Waaxdeeda Xeerka Fulinta. Wac degmada (Magaalada, Degmadda ama Magaalada) aad ku nooshahay.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Pennsylvania, Xafiiska Ilaalinta Macaamiisha

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha guud ee Pennsylvania, Xafiiska Ilaalinta Macaamiisha ayaa baarta cabashooyinka macaamiisha iyo iskudayada lagu dhexdhexaadinaayo oo laguugu saxayo dhibaatooyinka adiga kugu dhaca.

- Khadka Tooska ah ee Adeegga Macmiilka waa 1-800-441-2555.

Senior LAW Center

Senior LAW Center waxay u adeegtaa dadka da'doodu tahay 60 jirka iyo wixii ka weyn. La-talin sharci, la-talin, macluumaad, iyo adeegyo gudbin ayaa laga heli karaa 1-877-PASRLAW (727-7529) ama www.seniorlawcenter.org.

Disability Rights PA

Disability Rights PA waxay ilaalisaa oo u doodeysaa xuquuqda dadka naafada ah si ay ugu noolaadaan nolosha ay doortaan, kana xor noqdaan xadgudubka, dayaca, takoorka, iyo kala sooca. Booqo websaydhka www.disabilityrightspa.org, imayl ugu dir intake@disabilityrightspa.org ama la xiriir xafiiska kuugu dhow:

Xafiiska Harrisburg
301 Chestnut Street
Suite 300
Harrisburg, PA 17101
1-800-692-7443 (cod)
1-877-375-7139 (TDD)
(717) 236-8110 (cod)
(717) 236-0192 (fakis)
drnpa-hbg@drnpa.org

Xafiiska Philadelphia
The Philadelphia Building 1315 Walnut Street
Suite 500
Philadelphia, PA 19107-4798
(215) 238-8070 (cod)
(215) 772-3126 (fakis)
drnpa-phila@drnpa.org

Xafiiska Pittsburgh
429 Fourth Avenue
Suite 701
Pittsburgh, PA 15219-1505
(412) 391-5225 (cod)
(412) 467-8940 (fakis)
drnpa-pgh@drnpa.org

Pennsylvania Bar Association

Adeegga Gudbinta Qareenka ee PBA (LRS) wuxuu u diraa dadka soo wacayaasha qareennada jooga gobollada aan lahayn adeeg gudbin. Adeegani wuxuu daboolayaa 45 ka mid ah 67-ka degmo ee the Commonwealth of Pennsylvania, waxaana lagu heli karaa adigoo wacaya 800-692-7375 (oo loogu talagalay wicitaanada gobolka kaliya), 717-238-6807 or http:// www.pabar.org.

Adeegyada Gudbinta Qareenada Deegaanka ee Pennsylvania

Haddii aad u raadineyso qareen degmo hoos ku taxan, fadlan toos ula xiriir Adeegga u diritaanka Qareen ee ururka Bar si toos ah.

Allegheny County, Pittsburgh
(412) 261-5555

Beaver County, Beaver

(724) 728-4888

Berks County, Reading

(610) 375-4591

Blair County, Hollidaysburg

(814) 693-3090

Bucks County, Doylestown

(215) 348-9413
(888) 991-9922

Butler County, Butler

(724)-841-0130

Carbon County, Lehighton

(610) 379-4950

Chester County, West Chester
(610) 429-1500

Cumberland County, Carlisle
(717) 249-3166

Dauphin County, Harrisburg
(717) 232-7536

Delaware County, Media

(610) 566-6625

Erie County, Erie

(814) 459-4411

Franklin County, Chambersburg:

(717) 267-2032

Lackawanna County, Scranton
(570) 969-9600

Lancaster County, Lancaster
(717) 393-0737

Lebanon County, Lebanon

(717) 273-3133

Lehigh County, Allentown

(610) 433-7094

Luzerne County,

Wilkes-Barre

(570) 822-6029

Mercer County, Mercer

(724) 342-3111

Monroe County, Stroudsburg

(570) 424-7288

Montgomery County, Norristown
(610) 279-9660

Northampton County, Easton
(610) 258-6333

Philadelphia County, Philadelphia
(215) 238-6333

Washington County, Washington
(724) 225-6710

Westmoreland County, Greensburg
(724) 834-8490

York County, York

(717) 854-8755

Pennsylvania Legal Aid Network, Inc.

Hadaad u maleynaysid inaad uqalmi karto caawimaad sharciyeed oo bilaash ah, xafiiska Caawimaadda Sharciga ee kuugu dhaw waxaad kuheli kartaa adoo tagaya www.palegalaid.net, guji Service/Staff Locator, kadibna degmadaada kutaala Pennsylvania. Ama waad soo wici kartaa 717-236-9486 oo aad raacdaa tusmooyinka si aad u maqashid macluumaadka xiriirka ee xafiiska Caawimaadda Sharciga ee degmadaada.

Haddii aadan u-qalmin Caawimaada sharciga ama haddii xafiiska Caawimaadda Sharciga ee aad la xiriirto uusan ku caawin karin sabab kasta ha noqotee, fadlan fiiri PALawHELP.org si aad u aragto waxa agabyo dheeraad ah iyo macluumaadka sharci ee adiga aad heli karto.

Mashruuca Sharciga Adeegga Pennsylvania

Ma wejihidaysaa in lagaa gooyay adeegyadaada? Adeeg la'aan matahay? Deganeyaasha PA ayaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan caawimaad sharci oo bilaash ah.

- Wac 1-844-645-2500 ama imayl ugu dir utilityhotline@palegalaid.net.

PA Housing Search

- www.pahousingsearch.com
- Lambarka lacag la'aanta ah: 1-877-428-8844. TTY waa 7-1-1.
- Qalabka raadinta ee Hay'adda Lacagta Guryaha ee Pennsylvania waxay ka caawisaa dadka raadinta guryeynta mowduucyo ay ka mid yihiin qaddarka kirada, meelaha danta laga leeyahay, gelitaanka, ama helitaanka gaadiidka dadweynaha. Websaydhka, waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo gobolka oo dhan iyo ilaha, oo ay ku jiraan liistada hubinta kirada, xisaabiyaha kirada, macluumaadka adeegyada, gaadiidka, Su'aalaha Inta badan la Isweydiiyo ee la xiriira kirada, iyo waxyaabo kaloo badan adigoo booqanaya qaybta “Macluumaadka iyo Xiriiryada” ee websaydhkan.

Kaalmooyinka Guud

Si aad u aragtid haddii aad xaq u leedahay kaalmooyinka guud, sida LIHEAP (Caawinta Tamarta), Foojarka Cuntada, Gargaar Caafimaad, CHIP, Gargaarka Lacageed, Barnaamijka Shaqada Daryeelka Ilmaha,
Cunnooyinka Dugsiga, Adeegyada Muddada Dheer, iyo Wax kaqabadka Hore, Naafonimada Dhimirka ama Adeegtada Ootisimka, booqo www.compass.state.pa.us.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad dhanka buuxinta dalabkaaga COMPASS, ka wac KHADKA CAAWIMAADA 1-800-692-7462 inta u dhaxaysa 8:30 a.m. iyo 4:45 p.m., Isniinta ilaa Jimcaha.

Haddii aad dhaga beel qabtid, ka wac TTY/TTD taleefoonka ah 1-800-451-5886. Haddii aad su'aal qabtid inta lagu jiro saacadaha aan shaqada ahayn ama aad doorbideyso inaad adeegsato boosto, waxaad kala xiriiri kartaa imayl ahaan adigoo u marayo websaydhkooda.

2-1-1 United Way

- www.pa211.org ama wac 2-1-1.
- PA 2-1-1 waa marin agab iyo macluumaad bilaash ah oo kugu xiri kara caafimaadka gaarka loo leeyahay, guryaha, iyo macluumaadka adeegyada aadanaha.
- Adoo wacaya 211, waxaad ka heli kartaa macluumaad la xiriira cuntada, guryaha, shaqada, daryeelka caafimaadka, iyo adeegyo kale oo kala duwan.

Maamulka Guryaha Dadweynaha

Hadaad ubaahantahay caawimaad guriyeyn dadweyne ama macluumaad kusaabsan barnaamijyada gurisiinta dadweynaha, sida Choice Vouchers (HCVs), fadlan laxiriir maamulka guryaha dadweynaha ee degmadaada (PHA). Barnaamijka HCV waa barnaamijka ugu weyn ee fadaraaliga kaas oo ka caawiya qoysaska dakhligoodu hooseeyo, dadka waaweyn, iyo shakhsiyaadka naafada ah inay ka helaan guri hufan, amaan ah, iyo nadiif ah ee suuqyada guryaha gaarka loo leeyahay. Hadaad ubaahantahay caawimo helida maamulka guryaha dadweynaha ee degmadaada, wac 2-1-1 (United Way) wixii macluumaada ah.

Agabyada Guryaha ee Bilowga Degdeg ah

- www.phfa.org/mhp/serviceprovider
- U adeegso boggan si aad u hesho macluumaadka xiriirka, ee degmo, adeeg bixiyayaasha guryeynta ee kala duwan oo ay ku jiraan masuuliyiinta guryaha, dadka guryaha siiyo kuwa ah hoylaaweyaasha, hay'adaha waxqabadka bulshada, iyo inbadan. Guji halka ay ku taal “Hot Topics” si aad u aragto liiska hoos u raacida ee gobollada Pennsylvania oo aad doorato degmo si aad u aragto.

Pennsylvania Utility Commission

Macaamiisha adeegga waxay soo wici karaan khadka tooska ah ee PUC taleefanka 1-800-692-7380 ee la xiriira cabashooyinka, joojinta ama qabanqaabada lacag bixinta. Waxay ku weydiinayaan inaad marka hore wacdid shirkada adeeggaaga si aad isugu daydid xallinta dhibaatada. www.puc.state.pa.us

Pennsylvania LINK ee Waayeelka iyo Agabyada Dadka Naafada ah

- Taleefoonka KHADKA BILAASHKA AH: 1-800-753-8827.
- Xarumaha Waayeelka iyo Dadka Naafada ah (ADRC) waa dadaal qaranka oo dhan ah si loogu caawiyo dadka waayeelka ah iyo shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan caawinta howlaha nolol maalmeedka. ADRC ee Pennsylvania waxaa loo yaqaanaa Link.
- PA Link wuxuu si fudud: kuugu xiriirin karaa adeegyada deegaanka iyadoo loo marayo hay'ad kasta oo lammaane la ah LINK; kaa caawin doona inaad sahmiso xulashooyinka jira si aad u xaqiijiso qorshe aamin ah oo madax-bannaan; kaa caawin doonaa codsiyada si loo go'aamiyo u-qalmitaanka; oo kaa caawiya inaad ku sii jirto, ama ku soo noqoto, bulshadaada.

Wax ka Beddelka Haboon

Hadaad curyaan tahay oo aad ubaahantahay inaad wax ka badal ku sameyso gurigaaga ama aad ubaahantahay aaladaha teknolojiyada caawimaada ama adeegyada si kor loogu qaado tayada noloshaada, **Hay'adda Caawinaada tikniyoolajiyadda ee PA** ayaa ka caawin kartaa dadka naafada ah iyo dadka waaweyn ee Pennsylvania in ay helaan teknolojiyadda caawinta ee ay ugu baahan yihiin dulsaar hooseeya iyo 0% dulsaar amaah deyn. macluumaad iyo caawimaad ku saabsan ilaha dhaqaale ee suurtogalka ah oo ay ku jiraan deeqaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, waxbarashada maaliyadeed iyada oo loo marayo daabacado kala duwan iyo la-talin shaqsiyeed. Hay'adda Caawinaada tikniyoolajiyadda ee PA waxay ka caawisaa dadka reer Pennsylvanians ah ee da 'kasta leh, dhammaan heerarka daqliga iyo dhammaan naafada. www.patf.us

Hay'adda Caawinaada tikniyoolajiyadda ee Pennsylvania

1004 West 9th Avenue #130 King
of Prussia, PA 19406 (484) 674-
0506 (voice)

(888) 744-1938 (Lambarka lacag la'aanta ah)
(484) 674-0510 (fakis)
patf@patf.us

Adeegyada Naafada Kale

The Self-Determination Housing Project (SDHP) of Pennsylvania waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo gobolka oo dhan ka shaqeysa si ay u ballaariso xulashooyinka guryeynta ee loogu talagalay dadka naafada ah ee ku nool Pennsylvania. SDHP waxay siisaa macluumaad iyo agabyo dadka naafada ah iyo qoysaskooda arrimaha ku saabsan xulashooyinka guryaha. SDHP waxay sidoo kale maamushaa dhowr barnaamijyo guryo oo gobolka oo dhan ah iyo/ am degmada oo ay ku jiraan Barnaamijka Isuduwaha Guriyeynta Gobolka iyo PA Accessible Housing Program, oo ah barnaamij deeq ah oo wax looga beddelayo guryaha.

www.sdhp.org

711 East Lancaster Ave. Downingtown, PA 19335
(610) 873-9595 (cod)
1-877-550-7347 (Lambarka lacag la'aanta ah)
(610) 873-9597 (fakis)

Khadka Tooska ah ee Rabshada Guriga ee Qaranka

1-800-799-7233 (SAFE)
1-800-787-3224 (TTY)

Isbahaysiga Pennsylvania ee ka Hortaga Rabshadaha Guriga

Howlaha la siiyo dhibbanayaasha rabshadaha qoyska waxaa ka mid ah: faragelinta xasaradda; la talin; uraacida booliiska, caafimaadka, iyo tas-hiilaadka maxkamadda; iyo hooyga degdega ee ku-meelgaarka ah ee dhibbanayaasha iyo carruurtooda ku tiirsan. Ka-hortagga iyo barnaamijyada waxbarashadda ayaa la bixiyaa si loo yareeyo halista rabshadaha guriga ka dhaca bulshada dhexdeeda.

1-800-932-4632 (gudaha Pennsylvania)
1-800-537-2238 (qaran ahaan)

Nofeembar 2019

Wixii macluumaad dheeri ah ama cusboonaysiinta nuxurka, fadlan ka fiiri buug-yarahan www.lhop.org ama la xiriir 717.291.9945 ext. 110.